



Jamhuuriyadda Somaliland
Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda

Miisaaniyadda

Dawladda Dhexe

ee 2023



JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-966/122022

Taar: 17/12/2022

Wareegto Madaxweyne

Dhaqan-galka Miisaaniyad Sannadeedka 2023-ka

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;


Markaan Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada, Go'aan Lr. GW/KF-04/956/2022 ee ku taariikheysan 03/12/2022, kuna ansixiyeen Miisaaniyadda Sannadka 2023-ka.

Waxaan Soo-Saaray;

Dhaqan-galka Miisaaniyad Sannadeedka 2023-ka oo ka kooban Miisaaniyadda Dawladda Dhexe, Dawladaha Hoose, Hay'adaha Madaxbannaan iyo Deeqaha Caalamiga ah oo dhan SL.SH/= 3,581,440,706,340/= (Saddex Tirilyan, Shan Boqol Kow iyo Siddeetan Bilyan, Afar Boqol iyo Afartan Milyan, Toddoba Boqol iyo Lix Kun, Saddex Boqol iyo Afartan Shillin Somaliland ah). Miisaaniyaddu waxay dhaqan-gal noqon doontaa 01 January 2023.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland





Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha Wakiilladda



The Republic of Somaliland
House of Representatives

Xafiiska Guddoomiyaha - Office of the Speaker

Mob: +252-513503

(Hargeisa - Somaliland)

E-mail:speaker@somalilandparliament.net

Ref: GW/9/09/753/2022

Date: 03/12/2022

Ku: Md. Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha JSL

= Xafiiskiisa=

Ujeedo: Soo Gudbin Go'aanka Miisaaniyadda Qaranka 2023.

Mudane Madaxweyne,

Waxaa aan si Sharaf iyo qadarin leh halkan kuugu soo gudbinaynaa **Go'aanka Miisaaniyadda Qaranka 2023.**

- 1. Go'aanka Miisaaniyadda Qaranka 2023 (Go'aanka Lr.GW/KF-04/956/2022)**

ALLAH MAHAD LEH

Cabdirisaaq Khaliif Axmed
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL



BY PRESIDENCY: 7774
Mag No: _____

03 DEC 2022

RECEIVED



**The Republic of Somaliland
House of Representatives**



**Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha wakiilada**

Head Quarter Hargeisa.

Xarunta Hargeisa

Ref: GW/KF-4/956/2022

Date: 03/12/2022

GO'AANKA ANSIXINTA MIISAANIYADDA DAWLADDA EE 2023-KA

- MARKUU ARKAY:** Qodobada 53aad,54aad iyo 55aad ee Dastuurka Qaranka.
- MARKUU DHEGAYSTAY:** Xog-waranka Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda ku iftiimiyay Odoroska Miisaaniyadda Dawladda ee 2023ka.
- MARKUU DHEGAYSTAY:** Xog-warankii soo jeedinta iyo talooyinkii Guddi hoosaadka dhaqaalaha ee Golaha Wakiillada.
- MARKUU KA DOODAY:** Qaybaha kala duwan ee Miisaaniyadu ka kooban tahay.
- MARKUU U CODEEYAY:** Ansixinta odoroska Miisaaniyada Dawladda ee sanadka 2023ka kal-fadhigii 4^{aad} fadhigisii 27^{aad} ee **29/11/2022** oo ay goob joog ahaayeen **65** Mudane oo ka mid ah mudanayaasha Golaha Wakiillada.

WUXUU COD AQLABIYADA AH (55 COD) OO GACANTAAG AH KU ANSIXIYAY.

1. Odoroska Miisaaniyadda **2023** oo qadarkeedu dhanyahay **3,581,440,706,340 SL.Sh** (Saddex Tiriliyan, shan boqol iyo sideetan iyo hal bilyan, afar boqol iyo afartan milayn, todobo boqol iyo lix milayn, saddex boqol iyo afatan kun oo shilin Somaliland ah.



Faah-faahinta Dakhliga Miisaaniyada 2023

| No. | Magaca | Budget 2022 | Budget 2023 | Faraqa |
|-----|---|--------------------------|--------------------------|--------------|
| 1. | Miisaaniyadda Dawladda Dhexe | 2,410,452,894,335 | 2,530,336,471,862 | 119,883,577 |
| 2. | Miisaaniyadda Dawladaha Hoose | 528,878,259,786 | 589,899,197,085 | 61,020,937, |
| 3. | Miisaaniyadda Hay'addaha Madaxa Banaan | 276,986,730,707 | 277,792,895,534 | 806,164,82 |
| 4. | Miisaaniyadda Mashriicda Baanka Aduunka | 51,889,758,410 | 31,434,732,990 | -20,455,025, |
| 5. | Miisaaniyadda Sanduuqa (SDF) | 96,854,072,980 | 77,146,510,000 | -19,707,562, |
| 6. | Miisaaniyadda Mashruuca maamul-daadejinta JPLG | 19,894,061,320 | 18,069,907,869 | -1,824,153, |
| 7. | GIZ (RDRM project) | 27,132,000,000 | 16,800,000,000 | -10,322,000 |
| 8. | ILED (ILED project) | 35,714,728,000 | 21,760,991,000 | -13,953,737 |
| 9. | Mashruuca Horumarinta berbera (UN-Habitat) | | 18,200,000,000. | |
| | Wadarta Guud | 3,447,802,505,538 | 3,581,440,706,340 | 133,638,200 |

Go'aamada lagu soo daray Miisaaniyadda Qaranka ee 2023.

1. In Barnaamijka Shaqo qaran dib u qiimayn lagu sameeyo, si loo hubiyo in uu sii socon karo Barnaamijku iyo in kale.
2. In Jaamacaddaha gaar ka loo leeyahay laga taageero kharashka Cilmi baadhista sanadka 2024-ka
3. Waa in qiimayn lagu sameeyaa lacagaha sharci darada ah ee ay qaadaan hay'addaha Dawladdu, isla markaana la sharciyeeyo wixii muhiim loo arko, lana joojiyo sanadka 2023.



4. In nidaamka bixinta Mushaharaadka Ciidamada laga dhigo nidaam bangiyeedka ay ku qaataan Shaqaalaha kale ee Dawladda
5. In Miisaniyadda Dawladdaha Hoose lagu soo dhamaystiro Darajada 'D' looguna qaybiyo kabka sida uu tilmaamayo Xeerka Is-maamulka Gobolada iyo Degmooyink Dalka ee Xeer Lr.23/2019
6. Waa in Nidaam Xisaabeedka Iskuulada Dawladda dib u habayn lagu sameeyaa
7. Waa in Wasaaradda Shaqo galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoysku nidaamisaa Kaalmooyinka ay helaan Uruurada Bulshada ee Baahiya gaarka leh
8. Waa in Wasaaradda H.Maaliyaddu soo faah faahisaa Madax xigayaasha Miisaniyadda ee aan faah faahsanayn soona raaciyaa lifaaqyadda muhiimka ah
9. Waa in Sanadka 2023-ka Golaha la hor keenaa Xeerka Warshadaha iyo Xeerka Wax wada lahaanshaha Dawladda iyo Dadka,sidoo kalena, Golaha la hor keenaa wixii heshiisyo ah ee Dawladdu la gashay Dhinacyo kale
10. Waa in la hoos geeyaa Macadka Shaqaalaha Dawladda Tobobarada uu Awoodda u leeyahay
11. Waa Kabka Miisaniyadda ee Hay'adda Duulista iyo Hawada ee ku jira Miisaniyadda Wasaaradda H.Jidadka loo wareejiyo Maaliyadda
12. Waa in Madax xigeenka Kaalmada Guddida Ruqsad- bixinta iyo Ururka Qareenada ee ku jirta Miisaniyadda 2023-ka ee Wasaaradda Cadaaladda oo dhan 450,000,000, la kala qaado loona dhigo sidan;
 - i. Kaalmada Guddida Ruqsad-bixinta oo dhan 150,000,000
 - ii. Kaalmada Ururka Qareenada oo dhan 300,000,000
13. In magaca kaalmada ku jirta Wasaaradda Shaqo galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska ee Ururada Bulshada Daami loo bedelo magaca ah Adams Akaadami
14. Habraaca Kabka 12.5% ee Dawladda dhexe u qabato Dawladdaha hoose waa in marka ay Dawladdaha hoose usoo gudbiyaan Wasaaradda Arrimaha, waa in Wasaaraddu usoo Gudbiso Wasiirka W.H.Maaliyadda si uu hubiyo in laraacay Habka Qoondada Degmooyinka Ee Xeerku 23/2019 Jideyey , kadibna loo gudbiyaa Xisaabiyaha Guud, Waxaa Reeban Habraac kasta ama Xeer nidaamiye kasta oo ka horimanayaa Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka ee Xeer Lr.23/2019
15. Waa in Madax xigeenada Kaalmada Masaajidada & Xarumaha Qur'aanka iyo Kaalmada Jaamacadaha & Machadada ee ku jira Misaaniyadda Haamaha Shidaalka oo ay ku jirto lacag dhan 535,500,000 iyo 40,800,000 sida ay u kalahoreeyaan, loona wareejiyo Kaalmada Iskuulada Hoyga ee Gobolka Saaxil.



16. Waa in Madax xigeenka Kaalmada Guud ee Ku jira Misaaniyadda Dekeda Berbera oo ay ugu jirto lacag dhan 4,869,650,000 looga jaro Kaalmada Iskuulada Hoyga ee Gobolka Saaxil lacag dhan 645,000,000.
17. Waa in Madax xigeenka Dhismayaasha ee Misaaniyadda Haamaha Shidaalka Berbera laga Wareejiyo 2,500,000,000 loona wareejiyo Biyo Balaadhinta Magaalada Berbera

1. Madax xigeeno Wasaaraddaha dhexdeeda layskugu bedelay

1. In Madax xigeenada Miisaaniyadda Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska ee Faah faahintooda hoos ku qoran yihiin ee kala ah,

| TIX | Madax xigeenka | Tirsiga/Code | MIIS 2023 |
|-----|----------------------------------|--------------|----------------------|
| 1 | Kaalmada Akadamiyada Fanka | 2640108 | 200,000,000 |
| 2 | Kharashka Kormeerka Waxbarashada | 2211352 | 236,250,000 |
| 3 | Kharashka Wacyigalinta | 2210504 | 94,500,000 |
| 4 | Iibsiga buugta Dugsiga | 2211004 | 1,047,905,121 |
| 5 | Kharashka Manahijta | 2211357 | 272,500,000 |
| | Total | | 1,851,155,121 |

Loo Wareejiyo Madax xigeenka Dhismayaasha Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska lacag dhan **851,155,121** halka **1,000,000,000** soo hadhayna loo galinaayo Qalabaynta Laybareeriyo.

2. In lacagta ku jirta Madax xigeenada Kaalmada Cisbitaaladda Dhimirka ee Miisaaniyadda 2023-ka ee Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka oo dhan **1,290,000,000** loo kala wareejiyo Madax xigeenada Isla Wasaaradda H.Caafimaadka ee kala ah;
- Kaalmooyinka Guud laguna daro lacag dhan **600,000,000** oo laka siin doono Xarumaha Caafimaadka MCH.
 - Gurmadka Xaaladdaha deg deg ah ee Caafimaadka laguna shubo lacag dhan **690,000,000**



MA AXYADDA WAX LAGA JARAY

| FIX | CODES | n, | Miis 2022 | Miis 2023 | ARQI | %FARQI | %L.K | LACAGTA L.K. |
|-----|---------|--|----------------|----------------|-----------|--------|--------|----------------|
| 1 | 6530101 | Kaydka Qaranka | 39,401,817,905 | 25,000,000,000 | - | -36.6% | 40.00% | 10,000,000,000 |
| 2 | 2840104 | Kharashka Lama filaanka ah(Madaxtooyadda) | 12,800,000,000 | ,000,000,000 | ,000,000 | 9.4% | 30.00% | 4,200,000,000 |
| 3 | 2400244 | Sanduqa Qurbo Joogta | 1,795,500,000 | 795,500,000 | - | 0.0% | 15.20% | 272,916,000 |
| 4 | 2400229 | Mashruuca Sahaminta Macdanta iyo Shidaalka | 2,200,000,000 | 680,000,000 | ,000,000 | 67.3% | 40.00% | 1,472,000,000 |
| 5 | 2211348 | Sanduqa Aqoonsi Raadinta | 11,945,257,200 | ,582,460,000 | 7,202,800 | 22.1% | 29.00% | 4,228,913,400 |
| 7 | 2211333 | Kh.Diyaarinta Miisaaniyadda | 2,646,000,000 | 2,646,000,000 | - | 0.0% | 24.00% | 635,040,000 |
| 8 | 2210801 | Martigaadka iyo Munaasibadaha | 9,482,034,164 | 871,043,078 | ,008,914 | 4.1% | 20.00% | 1,974,208,616 |
| 9 | 2211334 | Kharashka Xisaab Xidhka | 1,874,880,000 | 874,880,000 | - | 0.0% | 27.00% | 506,217,600 |
| 10 | 2510101 | Kabka Miisaaniyadda | 5,634,776,973 | 037,358,170 | ,581,197 | 7.1% | 20.00% | 1,207,471,634 |
| 12 | 2400240 | Mashruuca Biyo Ballaadhinta Magaalooyinka | 14,100,000,000 | ,500,000,000 | ,000,000 | 17.0% | 8.00% | 1,320,000,000 |



| | | | | | | | | |
|--------------|---------|---|------------------------|------------------------|---------|-------|---------|-----------------------|
| 13 | 2210503 | Wargaysyada iyo Bugaagta | 2,431,926,328 | 863,926,328 | 000,000 | 17.8% | 15.00% | 429,588,949 |
| 14 | 2211301 | Khidmadda Baanka | 5,212,620,000 | 516,000,000 | 380,000 | 5.8% | 30.00% | 1,654,800,000 |
| 16 | 2211309 | W-Arrimaha Gudaha(Nabad galyada) | 9,704,344,890 | 630,344,890 | 000,000 | 9.5% | 10.00% | 1,000,000,000 |
| 17 | 2211309 | Miixtooyadda(Kh.Nabad galyada) | 6,923,489,858 | 923,489,858 | | 0.0% | 15.00% | 1,000,000,000 |
| 18 | 2211344 | Kh.Diyaarinta, Dib u habaynta iyo F.Shuruuca(G.G) | 1,471,616,453 | 771,616,453 | 000,000 | 13.6% | 3.58% | 600,000,000 |
| 19 | 2211344 | Kh. Dib u habaynta Shuruuca(G.D.SH) | 1,251,722,136 | 499,722,136 | 000,000 | 19.8% | 33.32% | 499,722,136 |
| 20 | 2400219 | Sanduqa Horumarinta Dhaqiyarada | 2,000,000,000 | 000,000,000 | | 0.0% | 100.00% | 2,000,000,000 |
| TOTAL | | | 127,624,263,771 | 140,192,340,913 | | | | 33,000,878,335 |

MADAX XIGEENADA WAX LAGU DARAY



| | Jaraayo | Lacagta loo jaraayo |
|--|--|----------------------|
| 1 | Komishanka Doorashoyinka | 3,000,000,000 |
| <i>Madax xigeenada wax lagu kordhinayo</i> | | |
| 1.1 | Iibsiga Hantida Raagta | 3,000,000,000 |
| 1.2 | Sub total | 3,000,000,000 |
| 2 | Komishanka Xakamaynta AIDS-ka | 300,000,000 |
| <i>Madax xigeenada wax lagu kordhinayo</i> | | |
| 2211005 | Iibsiga Rashinka iyo wixii Mdax banaan | 300,000,000 |
| | Sub total | 300,000,000 |
| 3 | Xafiiska Imtixaanadka Qaranka | 4,100,000,000 |
| <i>Madax xigeenada wax lagu kordhinayo</i> | | |
| 2210701 | Tabarada iyo Imtixaanada | 4,100,000,000 |
| | Sub total | 4,100,000,000 |
| 4 | Ciidanka Socdaalka | 530,000,000 |
| <i>Madax xigeenada wax lagu kordhinayo</i> | | |



| | | |
|---------|------------------------------------|--------------------|
| 2211201 | Batroolka, Naafatada iyo Saliidaha | 530,000,000 |
| | Sub total | 530,000,000 |

5 Dhaamka Saylac 1,000,000,000

Madax xigeenada wax lagu kordhinayo

| | | |
|--|-------------------------|----------------------|
| | Dhismaha Dhaamka Saylac | 1,000,000,000 |
| | Sub total | 1,000,000,000 |

6 Waddooyinka 1,000,000,000

Madax xigeenada wax lagu kordhinayo

| | | |
|--|------------------|----------------------|
| | | 1,000,000,000 |
| | Sub total | 1,000,000,000 |

7 Garoomo iyo Dhalinyarada 1,300,000,000



| | | |
|--|---|----------------------|
| 1 | Komishanka Doorashoyinka | 3,000,000,000 |
| <i>Madax xigeenada wax lagu kordhinayo</i> | | |
| 1.1 | Iibsigta Hantida Raagta | 3,000,000,000 |
| 1.2 | Sub total | 3,000,000,000 |
| 2 | Komishanka Xakamaynta AIDS-ka | 300,000,000 |
| <i>Madax xigeenada wax lagu kordhinayo</i> | | |
| 2211005 | Iibsigta Rashinka iyo wixii Mdax bannaan | 300,000,000 |
| | Sub total | 300,000,000 |
| 3 | Xafiiska Imtixaanadka Qaranka | 4,100,000,000 |
| <i>Madax xigeenada wax lagu kordhinayo</i> | | |
| 2210701 | Tabarada iyo Imtixaanada | 4,100,000,000 |
| | Sub total | 4,100,000,000 |
| 4 | Ciidanka Socdaalka | 530,000,000 |
| <i>Madax xigeenada wax lagu kordhinayo</i> | | |
| 2211201 | Batrootka, Naafatada iyo Saliidaha | 530,000,000 |



| | | |
|--|------------------|--------------------|
| | Sub total | 530,000,000 |
|--|------------------|--------------------|

5 Dhaamka Saylac 1,000,000,000

| <i>Madax xigeenada wax lagu kordhinayo</i> | | |
|--|-------------------------|----------------------|
| | Dhismaha Dhaamka Saylac | 1,000,000,000 |
| | Sub total | 1,000,000,000 |



| | | |
|--|---|-----------------------|
| Waddooyinka | | 1,000,000,000 |
| <i>Madax xigeenada wax lagu kordhinayo</i> | | |
| | | 1,000,000,000 |
| | Sub total | 1,000,000,000 |
| 7 | Garoomo iyo Dhalinyarada | 1,300,000,000 |
| <i>Madax xigeenada wax lagu kordhinayo</i> | | |
| | | |
| 8 | Ururka Dhakhatiirta | 70,000,000 |
| <i>Madax xigeenada wax lagu kordhinayo</i> | | |
| 2640414 | Kaalmada Ururka Dhakhatiirta Somaliland | 70,000,000 |
| | Sub total | 70,000,000 |
| 9 | Golaha Wakiilada | 13,000,873,335 |
| <i>Madax xigeenada wax lagu kordhinayo</i> | | |
| 2211328 | Kharashka Hawl Socodsiinta Guddiyada | 5,682,800,000 |
| 2211351 | kharaska Diyaarinta Shuruucaha iyo Siyaasaddaha | 1,000,000,000 |
| 2110303 | Gunno Hawleed | 1,318,073,335 |



| | | |
|---------|--|-----------------------|
| 2840103 | Kharashka Gaarka ah | 2,000,000,000 |
| 2210401 | Noolka iyo Sahayda Safarada Dibada | 1,000,000,000 |
| 5210503 | Biilasha Taagan | 1,000,000,000 |
| Cusub | Kh.dib u eegista Miisaniyadda & Xisaab Xidh | 1,000,000,000 |
| | Sub Total | 13,000,873,335 |

**10 Hay'adda U diyaar garawga
Afooyinka 1,000,000,000**

Madax xigeenada wax lagu kordhinayo

| | | |
|---------|-----------------------------|----------------------|
| 2640205 | Kharashka Gurmada Afooyinka | 1,000,000,000 |
| | Sub Total | 1,000,000,000 |

11 Golaha Guurtida 1,000,000,000

Madax xigeenada wax lagu kordhinayo

| | | |
|-------|---------------------------|---------------|
| Cusub | Daawaynta iyo Caafimaadka | 1,000,000,000 |
|-------|---------------------------|---------------|



| | | |
|-----------|----------------------------|----------------------|
| | Sub total | 1,000,000,000 |
| 13 | Diinta iyo Aw qaafa | 2,000,000,000 |

Madax xigeenada wax lagu kordhinayo

| | | |
|-----------|------------------------------------|----------------------|
| | Sub total | 2,000,000,000 |
| 14 | Ciidamadda Ilaalada Xeebaha | 300,000,000 |

Madax xigeenada wax lagu kordhinayo

| | | |
|-----------|---------------------------------|----------------------|
| 2211201 | Batroomka, Naaftada iyo Saliida | 300,000,000 |
| | Sub total | 300,000,000 |
| 15 | Maxkamadda Sare | 2,000,000,000 |

Miisaaniyadda Maxkamadda Sare 2023

| | | |
|-----------|----------------------------------|----------------------|
| | Sub total | 2,000,000,000 |
| 16 | Biyo Ballaadhinta Berbera | 1,000,000,000 |

Madax xigeenada wax lagu kordhinayo

| | | |
|--|------------------|----------------------|
| | Sub Total | 1,000,000,000 |
|--|------------------|----------------------|



3. Sixitaanka Kabka 12.5%

Guddidu waxa ay sixid ku samaysay Dakhliga Kabka 12.5% ee ay Dawladda dhexe u qabato Dawladdaha hoose iyada oo Guddidu isla eegtay Lacagta qoonda kabka ee ugu jirta buuga Miisaaniyadda Dawladda Dhexe iyo lacagta ay soo qoondaysteen Dawladdaha hoose ee ku jirta buuga Miisaaniyadda dawladdaha hoose.

Shaxdan hoose waxaa ku faah faahsan lacagta loo qoodeeyey Dawladdaha hoose iyo ta ay iyagu soo qoondaysteen iyo faraqa u dhaxeeyaa mid walba iyada oo guddidu faraqaas dib ugu qaybisay degmo kasta iyada oo u taaracaysa sida uu tilmaamo Xeerka Is-maamulka Gobolada iyo degmooyinka marka laga reebo degmooyinka 'D' ah oo aan ku dhamaystirnayn Miisaaniyaddan.


| | | | | 191,096,819,016 | INTA LOO QOONDEYAY | INTA MAQAN |
|---------|----------|--------------|-------------|------------------------|------------------------|-----------------------|
| Degmada | A | 6% | 48% | 91,726,473,128 | 61,893,887,734 | 29,832,585,394 |
| Degmada | B | 2% | 16% | 30,575,491,043 | 18,390,193,300 | 12,185,297,743 |
| Degmada | C | 3% | 24% | 45,863,236,564 | 28,223,168,534 | 17,640,068,534 |
| Degmada | D | 1.5% | 12% | 22,931,618,282 | 4,231,200,000 | 18,700,418,282 |
| | | 12.5% | 100% | 191,096,819,016 | 112,738,449,568 | 78,358,369,953 |

Ansixinta Miisaaniyada waxaa diiday (4) Mudane, Halka shan (5) Mudane-na ka aamuseen, Guddoomiyuhuna muu codayn sida caadada ah.

ALLAH MAHAD LEH

Jamaal Jaamac Xasan
Ku-simaha Xoghayaha Guud, ahna X/ku-xigeenka Guud

Md. C/risaaq Khaliif Axmed
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL





Jamhuuriyadda Somaliland
Wasaaradda Horumarinta
Maaliyadda



Republic of Somaliland
Ministry of Finance
Development

Xafiiska Wasiirka

Ref: WM/02/08-01/ /2022

Date: 31-10-2022

Ku: Golaha Wakiilada JSL

Hargeysa

Ujeedo: Soo gudbinta Miisaaniyadda Qaranka ee 2023

Mudane Gudoomiye, Gudoomiye ku xigeen iyo mudanayaasha kale

Aniga oo ka wakiila Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda oo gudanaysa waajibka Dastuurka Qaranka qodobkiisa 55aad farqadiisa 1aad, iyo xeerka Maamulka Maaliyadda ee Xeer No. 75/2016 qodobkiisa 5aad, waxaan si weyn ugu faraxsanahay in Maanta oo ay taariikhdu tahay 31-10-2022 idiin soo soo gudbiyo Miisaaniyadda guud ee Dawladda ee Sannadka 2023 oo ah Miisaaniyaddii 32 aad ee qarankani yeesho.

Dr. Sacad Cali Shire

Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL



Tusmada Buuga

| | | |
|----------|---|-----------|
| 1 | HORDHAC | 1 |
| 2 | GUUD-MARKA DHAQAALAH | 2 |
| 2.1 | Muuqaalka Saadaasha Dhaqaale ee Somaliland | 2 |
| 3 | HANTAAQOYINKA GUUD EE KU YIMID DHAQAALAH | 4 |
| 3.1 | Saamaynta Caalamiga ah ee Xanuunka Safmarka ah ee COVID-19..... | 4 |
| 3.2 | Saamaynta Dagaalka Ruushka iyo Yuk-reyn..... | 4 |
| 3.3 | Gubashadii Suuqa Waaheen | 5 |
| 3.4 | Abaaraha | 6 |
| 3.5 | Xayiraada Dhoofka Xoolaha | 7 |
| 3.6 | Xaalada Dalka aynu jaarka nahay ee Itoobiya..... | 7 |
| 4 | XAALADA GUUD EE DHAQAALAH | 8 |
| 4.1 | Sicir-bararka | 8 |
| 4.2 | Sarrifka Lacagta..... | 9 |
| 4.3 | Xawaaladaha | 10 |
| 4.4 | Ganacsiga..... | 11 |
| 4.4.1 | Dhoofinta Xoolaha | 11 |
| 4.4.2 | Soodejinta | 12 |
| 5 | SHAQAALAYSIINTA DAWLADDA 2018 ILAA 2023 | 14 |
| 6 | CIMILADDA | 15 |
| 6.1 | ROOBABKA DA'AY 2022 | 15 |
| 7 | WARBIXINTA HAB-SAMI U SOCODKA MIISAANIYADDA 2023 | 16 |
| 7.1 | Soo jireenka warbixinta wax-qabadka Miisaaniyadda..... | 16 |
| 7.2 | Dakhli Uruurinta Jan-June 2022 | 16 |
| 7.3 | Kharash-galka Dowladda Jan-June 2022 | 19 |
| 7.4 | Kharash galka Mashaariicda Bangiga Adduunka ee Jan-June 2022..... | 21 |
| 7.5 | Warbixinta Mashaariicda 2% Horumarinta Gobolada Barri ee 2022..... | 22 |
| 7.6 | Casriyeynta iyo hirgalinta Cutubtyada kale duwan ee SLFMIS-ka..... | 23 |
| 7.6.1 | Nuqulada kala duwan ee la hirgaliyey tan iyo markii la hirgaliyey Nidaamka SLFMISK-ka | 24 |
| 7.6.1.1 | Qeybta Qoondada saddex biloodka ah (Expenditure Warrant) | 24 |
| 7.6.1.2 | Qeybta Maamulka Kharash Bixinta (Expenditure Voucher)..... | 24 |
| 7.6.1.3 | Qeybta Dakhli Qabashada (Revenue Collection)..... | 24 |
| 7.6.1.4 | Qeybta Xisaab Xidhka (Financial Reports) | 24 |
| 7.6.1.5 | Qeybta Diyaarinta Miisaaniyadda (Budget Preparation Matual) | 24 |
| 7.6.1.6 | Qeybta Diyaarinta Mushaharka (paryrol Matual)..... | 25 |
| 7.6.1.7 | Qeybta libka (Purchase Matual)..... | 25 |



| | | |
|----------|---|-----------|
| 7.6.1.8 | Warbixinaha IPSAS (IPSAS Reports) | 25 |
| 7.6.1.9 | Qeybta diiwaan galinta hantida raagta (Asset Registration Mutual) | 25 |
| 7.6.2 | Nidaamyada kale ee Dowladda ee ay isku xidhmeen Nidaamka SLFMIS..... | 26 |
| 8 | MIISAANIYADA DOWLADDA DHEXE 2023..... | 27 |
| 8.1 | Siyaasadaha Miisaaniyadda 2023 | 27 |
| 8.1.1 | Siyaasadda Maaliyaddeed (fiscal policy) | 27 |
| 8.1.1.1 | Isku dheeli tirka Dakhliga iyo kharashka | 27 |
| 8.1.1.2 | Kor u qaadida saamiga ay Cashuuraha berrigu ka yihiin Dakhliga guud | 27 |
| 8.1.1.3 | Ilaalinta iyo kobcinta waxsoo-saarka gudaha | 27 |
| 8.1.1.4 | Diyaarinta Aagga loogu talo galay Warshadaha (industrial Zone) | 27 |
| 8.1.1.5 | Sii wadida Mashruuca Shaqo Qaran..... | 28 |
| 8.1.1.6 | Kaydka ku -talo galka Dhacdooyinka lama filaanka (Contingency fund)..... | 28 |
| 8.1.1.7 | Joojinta qaadista lacagaha aan sharciga ahayn (illegal fees)..... | 28 |
| 8.1.1.8 | Fududeynta Nidaamka Cashuur bixinta. | 28 |
| 8.1.1.9 | Hirgalinta dhamaan qaybihiisa kala duwan Nidaam Xisaabeeda iswada ee (SLFMIS)28 | |
| 8.1.1.10 | Ka Qayb qaadashada Diyaarinta Miisaaniyadda ee Bulshada rayidka ah..... | 28 |
| 8.1.2 | Siyaasadda lacageed (Monetary policy) | 29 |
| 8.1.2.1 | Sicir bararka | 29 |
| 8.1.2.2 | Isku bedelka Sarifka lacagaha | 29 |
| 8.1.3 | Meelaha Mudnaanta la siiyey Miisaaniyadda 2023..... | 30 |
| 9 | GUUD MARKA GUUD EE ODORASKA DAKHLIGA 2023..... | 31 |
| 9.1 | Meelaha la filayo in uu ka yimaado korodhka Dakhliga 2023 | 32 |
| 9.2 | Faah-faahinta Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2023 | 32 |
| 9.3 | Odoros Dakhliga Kastamada oo Deegamaysan 2023 | 34 |
| 9.4 | Odoros-ka Dakhliga Cashuuraha Berriga 2023 oo Deegamaysan | 35 |
| 9.5 | Isbarbardhiga Dakhliga dhabta ah ee Cashuuraha Beriga 2018-2022 | 36 |
| 9.6 | Faah-Faahinta kharashka Miisaaniyadda 2023 | 37 |
| 9.6.1 | Saamiga Wadaagayaasha ee Miisaaniyadda 2023 | 37 |
| 9.6.1.1 | Amaanka | 38 |
| 9.6.1.2 | Maamulka | 39 |
| 9.6.1.3 | Caafimaadka | 40 |
| 9.6.1.4 | Waxbarshada | 40 |
| 9.6.1.5 | Tamarta | 41 |
| 9.6.1.6 | Waxsoo-saarka..... | 41 |
| 9.6.1.7 | Deegaanka | 42 |
| 9.6.1.8 | Biyaha | 42 |
| 9.6.1.9 | Dhaqaalaha | 43 |
| 9.6.1.10 | Kaabayaasha Dhaqaalaha..... | 43 |
| 9.6.1.11 | Wadaagaha kale (cross-cutting Sector) | 44 |
| 9.6.2 | Soo Koobida Qeybaha Miisaaniyadda 2023 | 45 |
| 9.6.2.1 | Kharashka Shaqaalaha | 46 |



| | | |
|-----------|---|--------------|
| 9.6.2.2 | Karashka Alaabta & Adeegga Ama Hawl socodsiinta | 46 |
| 9.6.2.3 | Hantida Raagta..... | 47 |
| 9.6.2.4 | Mashaariicda Kale ee Dawladda..... | 47 |
| 9.6.2.5 | Kaalmooyinka & Daryeelka Bulshada ee Dawladdu Bixiso | 47 |
| 9.6.2.6 | Daynta Qaranka | 48 |
| 9.6.2.7 | Kharashka lama filaanka ah..... | 48 |
| 10 | MASHAARIICDA AY MAALGALINAYAAN QAADHAAN BIXIYEYAASHU 2023.... | 49 |
| 10.1 | Mashaariicda Baanka Adduunka (World Banka Projects)..... | 49 |
| 10.1.1 | Mashruuca Dib u Habeynta Shaqaalaha Dawladda | 49 |
| 10.1.2 | Mashruuca Horumarinta Korontada..... | 50 |
| 10.1.3 | Mashruuca Biyoole | 50 |
| 10.2 | Sanduuqa Horumarinta Somaliland (SDF)..... | 50 |
| 10.3 | Mashaariicda kobcinta dhaqaalaha Dadka Nugul iyo Horumarinta kaabayaasha dhaqaale ee bulshada..... | 51 |
| 10.4 | Mashruuca Maamulka khatarta Dabiiciga ah iyo Cuntada | 52 |
| 10.5 | Mashruuca Maamul daadajinta Dawaladah Hoose (JPLG) | 52 |
| 10.6 | Mashruuca Horumarinta Magaalada Berbera | 53 |
| 11 | MIISAANIYADDAHA DOWLADDAHA HOOSE IYO HAY'ADDAHA MADAXABANAAN EE 2023..... | 54 |
| 11.1 | Miisaaniyadda Hay'addaha Madaxabanaan ee 2023 | 54 |
| 11.2 | Miisaaniyaddaha Dowladdaha Hoose ee 2023..... | 54 |
| 12 | DAKHLIYADA MIISAANIYADDA KA BAXSAN EE AY QABATO W/H/MAALIYADDU | 56 |
| | Dakhliga Guud ee 2023 | 64-67 |
| | Miisaaniyadda Guud ee Dawladda 20232 | 66-70 |
| | Qorshaynta Miisaaniyadda 2023 ee Qaybaha Dalka (Summary)..... | 71 |
| | Faahfaahinta Qorshaha Miisaaniyadda ee Qaybaha Dalka | 72-74 |
| | Qorshaha Isticmaalka Miisaaniyadda ee 2023 (Summary) | 75 |
| | Faahfaahinta Qorshaha Isticmaalka Miisaaniyadda ee 2023 | 76-85 |
| | Soo koobidda Mashaariicda Deeqaha Dibedda ee 2022 (Multi-lateral Fund)..... | 86-88 |
| | Faahfaahinta Mashaariicda Deeqaha Dibedda 2022 (Multi-lateral Fund)..... | 89-99 |



Shaxda Miisaaniyadda Wasaaraddaha & Hayaaddaha 2023

| | |
|--|-----|
| Difaaca | 99 |
| Difaaca | 101 |
| Ciidanka Asluubta | 103 |
| Ciidanka Booliska | 105 |
| Ciidanka Ilaalada Xeebaha | 107 |
| Ciidanka Socdaalka | 109 |
| Ciidanka Dabdamiska | 111 |
| Wasaaradda Gaashaandhigga | 113 |
| Difaaca | 115 |
| Wasaaradda Horumarinta Biyaha | 117 |
| Komishanka Aids-ka Qaranka | 119 |
| Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka | 121 |
| Komishanka Mihnedlayaasha Caafimaadka | 124 |
| Hay'adda Dhawrista Tayada | 126 |
| Hay'adda U Diyaargarawga Aafooyinka & Kaydka Raashinka | 128 |
| Wasaaradda Deegaanka & Isbeddelka Cimilada | 130 |
| Wasaaradda Horumarinta Miyiga | 132 |
| Wasaaradda Qorshaynta & Horumarinta Qaranka | 134 |
| Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda | 136 |
| Hay'adda Caymiska Qaranka | 139 |
| Wasaaradda Ganacsiga & Dalxiiska | 140 |
| Hay'adda Aagga Cashuuraha ka Caaggan | 142 |
| Gudiga Qandaraasyada Qaranka | 144 |
| Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga & Wershedaha | 146 |
| Wasaaradda Jidadka & Horumarinta Waddooyinka | 148 |
| Wasaaradda Isgaadhsiinta & Teknoolojiyada | 150 |
| Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka & Guriyeynta | 152 |
| Qasriga Madaxtooyada | 154 |
| Golaha Guurtida | 157 |
| Golaha Wakiilada | 159 |
| Maxkamadda Sare | 161 |
| Maxkamadaha Hoose | 163 |
| Xeerilaalinta Guud Ee Qaranka | 165 |
| Hay'adda Shaqaalaha Dawladda | 167 |
| Machadka Shaqaalaha Dawladda | 169 |
| Hantidhawraha Guud Ee Qaranka | 171 |
| Garyaqaanka Guud Ee Qaranka | 173 |
| Wasaaradda Arrimaha Debadda & Xidhiidhka Caalamiga ah | 175 |
| Wasaaradda Cadaaladda | 177 |
| Komishanka Xuquuqal-Insaanka Qaranka | 179 |



| | |
|---|-----|
| Wasaaradda arrimaha Gudaha | 181 |
| Wasaaradda Dastuurka & Xidhiidhka Golayaasha | 183 |
| Gudiga Dib U Habaynta Shuruucda | 185 |
| Gudiga Doorashooyinka Qaranka | 186 |
| Gudiga Maamul-wanaaga & Ladagallanka Musuq-maasuqa | 188 |
| Gudiga Diwaangelinta Ururada | 190 |
| Wasaaradda Macdanta & Tamarta | 192 |
| Komishanka Tamarta | 194 |
| Wasaaradda Waxbarashada & Sayniska | 196 |
| Gudiga Tacliinta Sare | 199 |
| Wasaaradda Horumarinta Beeraha | 201 |
| Hay'adda Cilmibaadhista Beeraha | 203 |
| Wasaaradda Xannaanada & H. Kalluumaysiga | 205 |
| Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka & Wacyigelinta | 207 |
| Wasaaradda Diinta & Awqaafta | 209 |
| Wasaaradda Shaqogelinta, Bulshada & Qoyska | 211 |
| Wasaaradda Ciyaaraha & Dhallinyarada | 213 |
| Hay'adda Qaxootiga & Barokacayaasha | 215 |
| Jamciyadda Mujaahidiinta Sooyaal | 217 |
| Dawladdaha Hoose | 218 |
| Hay'adaha Madaxa-banaan | 219 |
| Miisaaniyadda 2023 ee Deeqaha Caalamiga ah | 220 |
| Formka Dhismayaasha Miisaaniyadda Dowladda Dhexe 2023 | 221 |
| Formka Faahfaahimaha kale ee Miisaaniyadda 2023 | 223 |
| Formka Faahfaahinta Kalmooyinka Miisaaniyadda 2023 | 225 |



Liiska Shaxaha

| | |
|---|----|
| SHAXDA 1: Miisaaniyadda Guud ee Qaranka ee 2023 | 1 |
| SHAXDA 2: Muuqaalka Saadaasha Dhaqaalaha Somaliland ee Mudada Dhexe | 3 |
| SHAXDA 3: korodhka Waxsoosaarka Guud (GDP) iyo sicir bararka gaar Dalalka ay Somaliland Ganacsi wadaaga leeyihiin iyo kuwa ay jaarka yihiin (2021-2023) | 5 |
| SHAXDA 4: Cel-celiska Xadiga Sicir-bararka oo Sadex-biloode ah (2021-2022) | 8 |
| SHAXDA 5: Isbarbardhigga Xadiga Sarrifka Shilinka Somaliland iyo Doolarka Oo Rubucle ah (Jan-June 2021-2022) | 9 |
| SHAXDA 6: Is-barbardhiga Wadarta Tirada Xoolaha Dhoofay oo Rubucle ah Sanaddaha (2020, 2021, 2022)..... | 11 |
| SHAXDA 7: Qiimaha Alaabta soo Degtay Jan-June 2022 | 12 |
| SHAXDA 8: Xaaladaha Koritaan ee Muddada Dhexe ee Wadarta Qiimaha Wax-soodejinta..... | 13 |
| SHAXDA 9: Shaxda Korodhka Tirada Shaqaalaha Dowladda Dhexe ee 2018 ilaa 2023 | 14 |
| SHAXDA 10: Dakhli Ururinta dhabta ah oo la barbardhigay Odoraska Miisaaniyadda SLSH (Jan-June 2022) | 17 |
| SHAXDA 11: Meelaha Mudnaanta la siiyay Miisaaniyadda 2023..... | 30 |
| SHAXDA 12: Isbarbardhiga Soo Koobida Qeybaha Waaweyn ee Dakhliga 2022-2023..... | 32 |
| SHAXDA 13: Faah-Faahinta Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2023 | 33 |
| SHAXDA 14: Odoraska Dakhliga Kastamada ee Miisaaniyadda 2023 oo Deegaamaysan..... | 34 |
| SHAXDA 15: Odoraska Dakhliga Cashuuraha Berriga ee Miisaaniyadda 2023 oo Deegaamaysan..... | 35 |
| SHAXDA 16: Soo Koobida Saamiga Wadaagayaashu ka yihiin Miisaaniyadda 2023..... | 37 |
| SHAXDA 17: Wadaagaha Amaanka iyo Difaaca | 38 |
| SHAXDA 18: Wadaagaha Maamulka..... | 39 |
| SHAXDA 19: Wadaagaha Caafimaadka | 40 |
| SHAXDA 20: Wadaagaha Waxbarashada..... | 40 |
| SHAXDA 21: Wadaagaha Tamarta | 41 |
| SHAXDA 22: Wadaagaha Wax-soosaarka | 41 |
| SHAXDA 23: Wadaagaha Deegaanka..... | 42 |
| SHAXDA 24: Wadaagaha Biyaha | 42 |
| SHAXDA 25: Wadaagaha Dhaqaalaha..... | 43 |
| SHAXDA 26: Wadaagaha Kaabayaasha Dhaqaalaha..... | 44 |
| SHAXDA 27: Wadaagayaasha Kale (Cross-Cutting Sector)..... | 44 |
| SHAXDA 28: Soo Koobida Qeybaha Waaweyn ee Kharashka Miisaaniyadda 2023..... | 45 |
| SHAXDA 29: Mashaariicda ay Maalgalinayaan Qaadhaan-bixiyayaashu Miisaaniyadda 2023 | 49 |
| SHAXDA 30: Faaf-faahinta Mashaariicda Sanduuqa (SDF) oo Deegaamaysan | 51 |
| SHAXDA 31: Miisaaniyadda Hay'addaha Madaxbanaan ee Sanadka 2023..... | 54 |
| SHAXDA 32: Odoraska Miisaaniyadda Dowladdaha Hoose ee Sanadka 2023 ee Degmooyinka Derejada "A" | 54 |
| SHAXDA 33: Miisaaniyadda Dowladdaha Hoose Sanadka 2023 | 55 |
| SHAXDA 34: Dakhliga Miisaaniyadda ka baxsan ee ay qabatay W/H/Maaliyaddu Jan-Sep 2022 iyo Odoraskooda 2023 | 56 |
| SHAXDA 35: Kharashyada Miisaaniyadda ka baxsan ee ay Wareejisay W/H/Maaliyaddu Jan-Sep 2022 iyo Odoraskooda 2023 ... | 56 |



Liiska Jaantuusyada

| | |
|--|----|
| Jaantuus 1: Isbed-beddelka Wax-soosaarka Guud ee Gudaha (GDP) iyo Saadaasha Mudada Dhexe | 3 |
| Jaantuus 2: Sicir-bararka Qeybaha Waaweyn oo sanadle ah (Sanadka laga duulayo 2012)..... | 8 |
| Jaantuus 3: Xadiga Sicir Bararka Qeybaha Waaweyn oo Sanadle ah 2020-2022 (Sanadka laga Duulayo 2012) | 9 |
| Jaantuus 4: Heerka Sarifka Shilinka Somaliland iyo Doolarka iyo Heerka Sicir-bararka oo bille ah (Jan-june 2021-2022) | 10 |
| Jaantuus 5: Xawaaladaha Lacagaha la soo diray iyo kuwa laga diray Somaliland oo Rubucle ah (2019-2022 US Millions) | 11 |
| Jaantuus 6: Wadarta Xoolaha Dhoofay oo Bille ah (2019-2022)..... | 12 |
| Jaantuus 7: Koritaanka Heerka iyo Qiimaha Wax-soodejinta Somaliland ee Xaaladaha Kala duwan ee Muddada Dhexe | 13 |
| Jaantuus 8: Shaxda Korodhka Tirada Shaqaalaha Dowladda Dhexe ee 2018 ilaa 2023 | 14 |
| Jaantuus 9: Roobabka Da'ay 2022 | 15 |
| Jaantuus 10: Odoraska Dakhliga iyo Dakhliga dhabta ah ee Sannadaha 2017-2020 | 16 |
| Jaantuus 11: Shanta shay ee ka kormaray Odoraska iyo Shanta shay ee ka hoos maray Odaraskoodii (Jan-June 2022) | 18 |
| Jaantuus 12: Wadarta Dakhli Ururinta Jan-June iyo Hay'addaha ka Masuulka ah (Billions SLSH) | 18 |
| Jaantuus 13: Dakhli-Ururinta Kastamada (Bidix) iyo Cashuuraha Berriga (Midig) oo goobaysan (Jan-June 2022)..... | 19 |
| Jaantuus 14: Kharash-galka Dowladda oo Sadexbilooh leh ah (2019-2022, Billions SLSH)..... | 20 |
| Jaantuus 15: Soo Koobida Kharash-galka Dowladda ee Qeybaha Waaweyn (Jan-June 2022) oo aanay ku jirin Deeqaha Banggiga Adduunku, Billions slsh..... | 20 |
| Jaantuus 16: Kharash-galka Dowadda ee Jan-June oo Wadaagaysan | 21 |
| Jaantuus 17: Isbarbar-dhiga soo koobida Qeybaha Waaweyn kharashgalka Dowladda ee Sadexbiloohka labaad (2021-2022)..... | 21 |
| Jaantuus 18: Dakhliga iyo Kharashgalka Mahsaariicda uu Bangiga Adduunku Maalgeliyo inta u dhaxaysay Jan-June 2022, Billions | 22 |
| Jaantuus 19: kharashgalka Mashaariicda Banggiga Adduunka ee Sanadadda (2020-2021) | 22 |
| Jaantuus 20: Soo Koobida Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2023 | 33 |
| Jaantuus 21: Saamiga Goob waliba ka tahay Wadarta Guud ee Kastamada Miisaaniyadda 2023..... | 35 |
| Jaantuus 22: Saamiga Goob waliba ka tahay Wadarta Guud ee Odoroska Miisaaniyadda 2023 ee Cashuuraha Berriga..... | 36 |
| Jaantuus 23; Isbarbardhiga Dakhliga Dhabta ee Cashuuraha Berriga 2018-2021..... | 37 |
| Jaantuus 24: Saamiga Wadaagayaashu ka yihiin Miisaaniyadda 2023 | 38 |
| Jaantuus 25; Soo Koobida Saamiga Qeybaha Miisaaniyadda 2023 | 46 |

Liiska Appendices

| | |
|---|----|
| Appendix 1: Liiska Mashaariicda Biyo Balaadhinta Magaalooyinka ee 2023 | 56 |
| Appendix 2: Liiska Mashaariicda Dhaamamka ee 2023..... | 56 |
| Appendix 3: Liiska Mashaariicda Ceelasha ee Miis 2023 | 57 |
| Appendix 4: Baaqiga Mashaariicda Socda | 57 |
| Appendix 5: Liiska Mashaariicda 2% Gobolada Barri ee Sool iyo Sanaag ee Sanadka 2022..... | 57 |
| Appendix 6: Liiska Dhismayaasha iyo libsigu Hantida Raagta ee Miisaaniyadda 2023 | 58 |



1 Hordhac

Miisaaniyadda 2023 waxay ka kooban tahay:

1. Miisaaniyadda Dawladda Dhexe
2. Miisaaniyadda Hay'adaha Madaxa-banaan
3. Miisaaniyadda Dawladaha Hoose
4. Miisaaniyada Sanduuqa Horumarinta Somaliland ee ay maalgeliyaan wadamada Deeq bixiyeyaashu (Somaliland Development fund)
5. Miisaaniyadda Mashruuca Maamul-daadejinta (JPLG)
6. Miisaaniyadda Mashaariicda Bangiga Aduunka
7. Miisaaniyadda Mashruuca GIZ
8. Miisaaniyadda Mashruuca Iled.
9. Mashruuca Horumarinta Magaalada Berbera

Isugeynta guud ee Miisaaniyada sannadka 2023 waa **3,581,440,706,340 sh.**, sida shaxda hoose ka muuqata. Miisaaniyadda dawladda dhexe waa **2,530,336,471,862**, taas oo ka badan tii hore **119,883,577,527 sh** una dhiganta **5%**.

SHAXDA 1: Miisaaniyadda Guud ee Qaranka ee 2023

| Faah-faahinta | Miisaaniyadda 2022 | Miisaaniyadda 2023 | Faraqa | % Isbed delka | % Saamiga Guud |
|---|--------------------------|--------------------------|------------------------|---------------|----------------|
| Miisaaniyadda Dowladda Dhexe | 2,410,452,894,335 | 2,530,336,471,862 | 119,883,577,527 | 5% | 71% |
| Miisaaniyadda Dowladdaha Hoose | 528,878,259,786 | 589,899,197,085 | 61,020,937,299 | 12% | 16% |
| Miisaaniyadda Hay'addaha Madaxa -banaan | 276,986,730,707 | 277,792,895,534 | 806,164,827 | 0% | 8% |
| Miisaaniyadda Mashaariicda Bangiga Aduunka | 51,889,758,410 | 31,434,732,990 | -20,455,025,420 | -39% | 1% |
| Miisaaniyada Sanduuqa (SDF) | 96,854,072,980 | 77,146,510,000 | -19,707,562,980 | -20% | 2% |
| Miisaaniyadda Mashruuca Maamul-daajejinta Dowladdaha hoose (JPLG) | 19,894,061,320 | 18,069,907,869 | -1,824,153,451 | -9% | 1% |
| GIZ (RDRM Project) | 27,132,000,000 | 16,800,000,000 | -10,332,000,000 | -38% | 0% |
| ILED (Iled Project) | 35,714,728,000 | 21,760,991,000 | -13,953,737,000 | -39% | 1% |
| Mashruuca Horumarinta M.berbera (UN HABITAT) | - | 18,200,000,000 | | | 1% |
| Wadarta Guud | 3,447,802,505,538 | 3,581,440,706,340 | 133,638,200,802 | 4% | 100% |



2 Guud-marka Dhaqaalaha

Abaartii dhacday sanadkii 2017 iyo xayiraadii dhoofka Xoolahu waxay sababeen in Dhaqaaluhu hoos u dhaco. Balse dhaqaalaha ayaa ka soo kabtay hoose u dhacii ku yimid 2017, isla markaana sameeyay kor u kac sanadada 2018 iyo 2019.

Kobocii Dhaqaaluhu sameeyay 2019, waxa mar kale dhaawacay oo hoos u dhigay Xanuunka Safmarka noqday ee Covid-19, kaas oo sababay hoos u dhac dhaqaale.

Ka soo kabashada hoos u dhaca dhaqaale ee uu sababay Covid-19 ayaa la rajaynayey in Xaaladu ku soo noqoto caadigeedii, balse waxa lamaaneeyay oo rajadii la qabay hoos u dhigay Gubashadii Suuqii ugu weynaa Somaliland ee Waaheen iyo Duulaanka uu Ruushku ku qaaday Yuk-reyn oo gabi ahaanba Dhaqaalihii Caalamka hoos u dhac weyn ku keenay

Sannadka 2023 iyo muddada dhexeba, dawladdu waxa ay filaysaa inaan la helin kobac badan oo dhaqaaluhu sameeyo sababaha aan kor ku soo sheegnay awgood.

2.1 Muuqaalka Saadaasha Dhaqaale ee Somaliland

Muuqaalka dhaqaalaha Somaliland ayaa weli ah mid aan la hubin. Saadaasha ayaa si joogto ah dib -u -eegis loogu sameeyaa si ka badan sidii caadiga ahayd si loo helo xogo badan oo lagu go'aan qaato. Iyadoo laga duulayo hoos-u-dhaca dhaqaalaha ee sannadka 2022 oo ay sababeen Gubashadii suuqa waaheen, Dagaalka u dhexeeya Ruushka iyo Yuk-reyne, Abaaraha inagu soo noqnoqday iyo Riiqdii ka dhalatay Xanuunka safmarka ee Covid-19. tilmaamayaasha furaha u ah Dhaqaalaha Ayaan wanaagsanyn marka la eego 6 biloodka hore ee sanadka 2022.


Warbixintii ugu dambaysay ee ka soo baxday Wasaaradda Qorshaynta Qaranka iyo Horumarinta ee ku saabsanyd Wax-soo-saarka guud ee gudaha (GDP), waxay muujinaysaa in dhaqaalaha Somaliland sameeyey soo kabasho xoogan sanadka 2021, kaas oo noqday **9.2%**, kana soo hinqaday hoos u dhacii uu sameeyey dhaqaaluhu sanadkii 2020 oo ahaa **-3.2%**.

Bangiga Aduunku wuxu Saadaalinayaa in Dhaqaalaha Caalamku sameeyo hoos u dhac ah 3% sanadka 2022 marka loo eego kobocii uu sameeyey sanadkii 2021. Sidaa si la mid ah, waxa la saadaalinayaa in Wadamada saxaraha ka hooseeya dhaqaalahoodu hoos u dhici doono sanadka 2022, kaas oo la finayo inuu noqdo 3.6% halka uu sanadkii 2021 ka ahaa 4%

Dhanka kale, Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu waxay Saadaalinaysaa in wax soo saarka Guud ee Guduhu (GDP) uu noqon doono 2.7% sannadka 2022, taas oo aad uga yar korodhkii i uu Dhaqaaluhu sameeyey sanadkii 2021 ka hor Dagaalka Yuk-reyn iyo gubashadii suuqa waaheen oo uu ahaa 9.2%.



Jaantuus 1: Isbed-beddelka Wax-soosaarka Guud ee Gudaha (GDP) iyo Saadaasha Mudada Dhexe



SHAXDA 2: Muuqaalka Saadaasha Dhaqaalaha Somaliland ee Mudada Dhexe

| Scenarios | | 2019a | 2020a | 2021a | 2022f | 2023f | 2024f |
|---------------------------|----------------|-------|-------|-------|-------|-------|-------|
| Existing forecast | | | | | 2.6% | 2.6% | 2.6% |
| Scenario 1 (optimistic) | GDP (USD m) | 2,346 | 2,274 | 2,483 | 2,550 | 2,652 | 2,785 |
| | GDP growth (%) | 6.2% | -3.1% | 9.2% | 4.0% | 5.0% | 5.0% |
| Scenario 2 (conservative) | GDP (USD m) | 2,346 | 2,274 | 2,483 | 2,583 | 2,712 | 2,847 |
| | GDP growth (%) | 6.2% | -3.1% | 9.2% | 2.7% | 4.0% | 5.0% |

Source: MoNPD data, MOFD estimates

a=Actual

f= Estimate



3 Hantaaqooyinka Guud ee ku yimid Dhaqaalaha

Somaliland Caalamka intiisa kale ayay kaga xidhan tahay xidhiidhada dhaqaale. Hoos-udhaca dhaqaale ee dunida ku Yimid ee ay la yimaaddeen safmarka COVID-19, Dagaalka Ruushka iyo Yuk-reyn, Abaaraha soo noqnoqday iyo Gubashadii Suuqa Waaheen. intaas oo is biirsatay waxa ay saamayn taban oo daran ku yeeshay dhaqaalaha maxalliga ah (sida ganacsiga oo is dhima, xawaaladaha oo hoos u dhacay, sicir-barar, cunto yaraan iyo dakhliga dawladda oo yaraaday. iwm.). Fahamka iyo saamaynta hantaaqooyinkani muhiim ayey u yihiin saadaalinta doorsoomayaasha dhaqaalaha guud iyo xulashada siyaasado hufan oo meelmar noqon kara oo Maaliyadeed iyo lacageed ee muddada dhexe.

3.1 Saamaynta Caalamiga ah ee Xanuunka Safmarka ah ee COVID-19

Laga soo bilaabo dabayaaqadii Sannadkii 2019, safmarka COVID-19 waxa uu caalamka ku hayey khasaare nafeed iyo mid Dhaqaale oo sii kordhaya iyada oo 600 Million oo qof laga helay cudurka, in ka badan 6.4 Million oo dhimasho ahna la diiwaangeliyey ilaa hadda. Badbaadinta nololsha dadka iyo ka-diyaargarowga caafimaad waxa ay kelliftay in karantiimooyin la sameeyo, la kala fogaado, la xidho ganacsiyo badan. Tallaabooyinka lagu xakamaynayo cudurka ee dunidu qaadatay waxa ay culays laxaad leh saareen dhaqaalihii iyada oo ay kala gooyeen qulqulkii ganacsiga, la waayey dakhli, shaqo la'aani timid, ganacsiyadii xidhmeen, dakhligii dawladdu hoos u dhacay ama laga leexiyey meelihii horumarinta loogu talo galay.

Haddii tallaabooyinka dawlada hore u maray ay kula tacaalayaan safmarka lagu guuleysto, waxa ay saamayn togan ku yeelan doontaa dawlada soo koraya oo ku tiirsan xawaaladaha iyo deeqaha. Hay'adda Lacagaha Dunidu (IMF) waxa ay tilmaamaysaa inaan la hubin in dhaqaalaha dunidu si dhakhso ah uga soo kaban Karin saamaynta dhaqaale ee safmarka.

Waxa la saadaalinayaa in Caalamka ay soo wajahayso hoos u dhacii dhaqaale ee ugu xumaa ee la arko 80 –kii sano ee u dambeeyay.

Bangiga Aduunku wuxu saadaalinayaa in dhaqaalaha Caalamku noqdo 2.9% sanadka 2022, halka uu 5.9% ka ahaa sanadkii ka horeeyay ee 2021, kaas oo ah heerkii ugu hoosaysay ee uu gaadho mudo laga joogo 80 sano.

Dhanka kale, waxa la saadaalinayaa in Wadamada saxaraha ka hooseeya dhaqaalahoodu hoos u dhici doono sanadka 2022, kaas oo la finayo inuu noqdo 3.6% halka uu sanadkii 2021 ka ahaa 4%

3.2 Saamaynta Dagaalka Ruushka iyo Yuk-reyn

Dhaqaalaha caalamku waa mid ay waxyeelooyin joogto ah ku hayaan dhibaatooyinka kala dambeeyay ee Covid-19 iyo dagaalka Yuk-reyn.

In ka badan laba sano oo uu socday Xanuunka safmarka ah ee Covid-19, Duulaanka uu Ruushku ku qaaday Yuk-reyn ayaa markale carqaladeeyey rajadii laga qabay soo kabasho uu sameeyo dhaqaalaha Caalamku, kaas oo sababay hoos u dhac ku yimid Guud ahaan Dhaqaalihii caalamka sida, qulqulkii badeecadaha oo yaraaday, sicir barar, qiimaha tamarta oo kor u kacay, cunto yaraan iyo xaalada dhaqaale oo adag.



Kor u kaca meceeshada Cuntada iyo shidaalka ayaa cirka isku shareeray, taas oo la saadaalinayo in cunto yaraan, macaluuc, nafaqo daro iyo saboolnimo soo wajahdo dalalka wax soo saarkoodu hooseeye ee ku tiirsanaa waxyaabaha dibeda looga keeno.

Ruushka iyo Yuk-reyn ayaa guud ahaan soo saara 30% Qamadiga Dunida, halka uu Ruushku kaligii 40% gaasta lagu isticmaalo yurub isagu ka iibiyo.

Markan eegno Qaarada Africa iyo siday ugu tiirsan tahay Qamadiga dibeda ay ka soo dhoofsadan, waxa la saadaalinayaa in sanadba sanadka ka dambeeya ay kor u sii kacayso baahida Qamidigu, isla markaana la saadaalinayo in sanadka 2025 Qaarada Afrika u baahan tahay 76 Milion tones oo Qamadi ah, taas oo 63% ay dibada uga imanayaa, isla markaana la rumaysanyahay hadii dagaaladu sii socdaan in Gaajo iyo Macaluul baahsan soo wajahi doonto.

Waxyaabaha kale ee ay dalalka Africanka ka soo dhoofsan jireen Rusia iyo Yuk-reyn ee tooska u taabtay wax ka mid ah: Bacarimiyaasha Beeraha iyo Xadiidka.

SHAXDA 3: korodhka Waxsoosaarka Guud (GDP) iyo sicir bararka gaar Dalalka ay Somaliland Ganacsi wadaaga leeyihiin iyo kuwa ay jaarka yihiin (2021-2023)

| | Real GDP growth (%) Koboca wax-soo saarka guud ee dhabta ah | | | Consumer prices annual (%) Qiimaha Sicirka oo Sanadleh ah | | |
|---------------------------|--|--------------------|--------------------|--|--------------------|--------------------|
| | Dhabta ah (Actual) | Dhabta ah (Actual) | Saadaal (forecast) | Dhabta ah (Actual) | Dhabta ah (Actual) | Saadaal (forecast) |
| | 2021 | 2022 | 2023 | 2021 | 2022 | 2023 |
| Euro Area | 5.3 | 2.8 | 2.3 | 2.6 | 5.3 | 2.3 |
| North America | 5.5 | 3.6 | 2.3 | 4.7 | 7.4 | 2.9 |
| Asia | 6.5 | 4.9 | 5.1 | 2.0 | 3.2 | 2.7 |
| Saudi Arabia | 3.2 | 7.6 | 3.6 | 3.1 | 2.5 | 2.0 |
| United Arab Emirates | 2.3 | 4.2 | 3.8 | 0.2 | 3.7 | 2.8 |
| Thailand | 1.6 | 3.3 | 4.3 | 1.2 | 3.5 | 2.8 |
| Malaysia | 3.1 | 5.6 | 5.5 | 2.5 | 3.0 | 2.4 |
| India | 8.9 | 8.2 | 6.9 | 5.5 | 6.1 | 4.8 |
| China | 8.1 | 4.4 | 5.1 | 0.9 | 2.1 | 1.8 |
| Sub-Saharan Africa | 4.5 | 3.8 | 4.0 | 11.0 | 12.2 | 9.6 |
| Kenya | 7.2 | 5.7 | 5.3 | 6.1 | 7.2 | 7.1 |
| Djibouti | 4.0 | 3.0 | 5.0 | 1.2 | 3.8 | 4.2 |
| Ethiopia | 6.3 | 3.8 | 5.7 | 26.8 | 34.5 | 30.5 |

Source: IMF World Economic Outlook—, April 2022

a=actual, f=forecast

3.3 Gubashadii Suuqa Waaheen

Soo kabashadii la filayey inuu sameeyo dhaqaalaha ka dib Covid-19, waxa markale soo wajaday masiibo kale oo baaxdeh oo ah gubashadii Suuqii weynaa ee Waaheen.

Suuqa waaheen wuxu ahaa suuq gacansiyeedka ugu weyn Somaliland, kaas oo u adeegi jiray guud ahaan Somaliland iyo Dalalka jaarkaba.

Masiibadan aan la filaynin waa mid si dab-ban iyo si toosa saamaynteedu u taabatay qoys kasta oo ka mid ah Somaliland.

Qiyaaso hor dhaca oo laga sameeyay Khasaaraha ka dhashay Gubashadii suuqa waaheen waxa lagu qiyaasay inay ku burburtay hanti gaadhaysa 1.5 ilaa 2 bilyan dollar, kuna burbureen ilaa 5,000 oo Meheradood.



Dhanka kale, waxa la saadaalinayaa in 10% la waayi daano dakhligii dowladu hore u Odorastay masiibadaa dhacday awgeed.

Walow Dowladdu ay itaalkeeda isugu geysay taakulaynta dadkii khasaarahu ka soo qaadhay iyo dib u dhiska Suuqii gubtay, hadana waa mid saameyntiisu sii jiri doonta dhowrka sano ee soo socda

3.4 Abaaraha

Somaliland, abaaruhu si joogto ah ayay dalka uga dhacayeen dhawr iyo tobankii sano ee u dambeeyay, waxaanay yeelanayeen saamayn kala duwan. Waxay saamayn dhaqaale oo taban ku yeelatay beeralayda iyo dhaqaalaha Gudaha. Dalku waxa uu u nuglaaday abaaro ka dib markii ay inta badan ku tiirsan yihiin xoolo-dhaqatada marka laga eego dhinaca noloshu iyo dhaqaalaha iyada oo xooluhu ay yihiin ilo muhiim u ah fursadaha shaqo, lacagta adag, isla markaana si weyn uga qayb qaata dakhliga dawladda iyo guud ahaan dhaqaalaha dalka. Kala duwanaanshaha cimilada iyo isbeddelka xaaladaha deegaanka ayaa ah arrimo muhiim ah oo had iyo jeer ay ka dhashaan abaaraha soo noqnoqda ee dalka oo dhan.

Hadda, xaaladda abaarta ayaa ka sii dareysa, ka dib markii laba xilli roobaad oo xidhiidh ah aanay wax Roobab ahi ka da'in gobollada qaar, halka kuwo kalena ay heleen waxoogaa aan badnayn. Tani waxa kale oo sii xoojisay ayax ku habsaday badi Gobolada dalka iyo Coronavirus oo saameeyay hab-nololeedka kumanaan qof. Hay'adda u diyaar garowga Aafooyinka iyo Kaydka Raashinka Qaranka ee NADFOR ayaa soo saartay warbixin toos ah oo ku saabsan la socodka abaaraha si ay xukuumadda iyo hay'adaha ay wada shaqaynta leeyihiin wax uga qabtaan xaaladda abaarta. Xukuumadda Somaliland waxa ay garwaaqsatay in xaaladda abaareed ee maanta jirta ay ka sii darayso, loona baahan yahay in si dhaw loo eego xaaladda jirta, isla markaana fiirto dheer iyo juhdi la geliyo sidii loo yarayn lahaa saamaynta ay abaaruhu ku yeeshen bulshada iyo dhaqaalaha. Madaxweynaha Somaliland waxa uu hawl-galiyay guddida heer qaran ee abaaraha (NDC), iyo NADFOR si ay u diyaariyaan qorshayaal iyo siyaasado lagu maaraynayo Abaaraha. Hadda abaaruhu waxay si xun u saameeyeen 810,000 oo qof kuwaas oo u baahan gargaar degdeg ah. Si kastaba ha ahaatee, haddii xaaladaha abaareed ee hadda jira ay sii jiraan saddexda bilood ee soo socda, waxa la saadaalinayaa wadarta guud ee dadka ay saameyn doontaa gaadhaan ilaa 1.5 milyan qof.

Maadaama ay xaaladdii ugu darnayd ee abaarta ahayd biyo la'aan, xukuumaddu oo kaashanaysa ganacsatada waaweyn ee dalka, waxay gaadhsiisay 24,600 booyadood oo biyo ah, kuwaas oo 72% ay bixiyeen dawladda iyo ganacsatada waaweyn, halka 28% ay bixiyeen hay'ado caalami ah.



3.5 Xayiraada Dhoofka Xoolaha

Sidaan wada ognahay, tan iyo markii uu dilaacay Xanuunka safmarka ee Covid-19, waxa dowlada sucuudigu yaraysay Tiradii xujaajta tagi jirtay Dalka Sucuudiga, taas oo keentay inay aad hoos ugu dhacaan Tiradii Xoolaha aan u dhoofin jirnay dalka Sucuudiga.

Sidaa awgeed, xayiraadaa sucuudigu saaray Xajka waxa ay inugu keentay in Dhaqaalihii inaga soo geli jiray dhoofinta Xoolaha wakhtiga Xajka la waayo, isla markaana uu is dhimo dakhligii aan hore ugu qoondaynay in uu inaga soo galo dhoofka xooluhu.

3.6 Xaalada Dalka aynu jaarka nahay ee Itoobiya

Itoobiya waa dal aynu jaar nahay kaas oo ay mudooyinkii dambe ka taagnaayeen xaalad siyaasadeed, isla markaana ay saameyn Amni iyo mid dhaqaalaba inagu keenayaan hadba xaaladda dalku sida ay tahay.

Hadaba, intii xaaladan siyaasadeed ka jirtay Itoobiya, waxa muuqata in uu is dhimay dakhligii aan ka heli jirnay badeecooyinkii u gudbi jiray dhanka Itoobiya, isla markaana ay mararka qaar hakad galaan badeecooyinka dhankooda inooga iman jirtay, sida Qaadka iyo Khudaarta kuwaas oo wax yeeleeyey guud ahaan Dakhliga.



4 Xaalada Guud ee Dhaqaalaha

4.1 Sicir-bararka

Sida ay tilmaamayso war-bixinta billaha ah ee Shaxda 4aad, guud ahaan sicirka alaabaha kala duwan ee dalka ayaa sareeyay lixdii bilood ee hore ee sanadkan 2022 (Jan- June) marka loo eego lix biloodkii sanadkii hore ee 2021 (Jan-June). Celcelis ahaan Lix biloodka hore ee sanadkan 2022 sicir bararku waxaa uu kordhay 7.3% marka loo eego lix biloodkii kal hore. Kor-u-kaca qiimaha alaabta oo ay ugu badan yihiin tamarta oo ay sababtay korodh ku yimi qiimaha shiidaalka oo kor-u-kacay dunida iyo Somaliland ba waxaa loo badaniyaa in uu keenay dagaalka ka dhacay dalka Ukrain iyo gubashadii suuqa Waaheen ee magaalada Hargeysa.


Kor-u-kaca sicirka alaabta ee xilligan ka jira Somaliland ayaa la filayaa in uu sidaa sii ahaado, iyada oo marka la eego ifafaalaha dhinaca xun wax ka eega (Pessimistic Scenario), wasaaradda horumarinta maaliyadda Somaliland saadaalinayso in xaddiga sicir-bararku gaadho 8% ilaa 9% inta ka ka hadhay sanadkan 2022. Dhinaca kale marka la eego ifafaalaha dhinaca wanaagsan wax ka eega (Optimistic Scenario) waxa uu sheegayaa in sicir-bararku hoos u soo dhaci doono isaga oo gaadhi doona 6.5% sanadkan 2022, sidaana kii socon doono sanadaha danbe oo noqdo 6.5% sanadka 2023 iyo 6% sanadka 2023.

Shaxda hoose waxa ay tilmaamaysaa celceliska isbedel ee xaddiga sicir-bararka oo isbarbardhig lagu sameeyay si rubucle ah sanadaha 2021 iyo 2022

SHAXDA 4: Cel-celiska Xadiga Sicir-bararka oo Sadex-biloode ah (2021-2022)


| Sadexbiloodka | Sicir-Bararka Alaabta Guud (Headline) | | Sicir-Bararka aanay ku jirin Cuntada iyo Tamartu (Core) | | Cuntada iyo wixii la Xidhiidha (Food crops & related items) | | Tamarta, Shiidaalka & Biyaha iwm) Energy, Fuels & Utilities (EFU) | |
|-------------------------|---------------------------------------|-------------|---|-------------|---|--------------|---|-------------|
| | 2021 | 2022 | 2021 | 2022 | 2021 | 2022 | 2021 | 2022 |
| Q1 | 0.3% | 0.6% | 0.2% | 0.6% | 0.7% | -0.6% | 0.9% | 1.6% |
| Q2 | 0.9% | 1.1% | 0.9% | 1.0% | 1.2% | 0.6% | 0.5% | 2.5% |
| Average Jan-June | 0.6% | 0.8% | 0.6% | 0.8% | 1.0% | 0.02% | 0.7% | 2.0% |

Jaantuus 2: Sicir-bararka Qeybaha Waaweyn oo sanadle ah (Sanadka laga duulayo 2012)





Jaantuus 3: Xadiga Sicir Bararka Qeybaha Waaweyn oo Sanadle ah 2020-2022 (Sanadka laga Duulayo 2012)



4.2 Sarrifka Lacagta

Marka la qiimeeyo celcelis ahaan qiimaha sarrifka Lacagta shillinka Somaliland iyo doolarka ee lix biloodkii hore ee sanadkan 2022 waxaa u ahaa 8,496 SLSh, halka uu ka ahaa sarrifku lix biloodkii sanadkii hore ee 2021 8,500 SLSh. Taas uu tilmaamaysa in qiimaha shilling ka Somaliland uu qiimo kordhay lix biloodkii hore ee sanadkan 0.1%.

Bangiga Somaliland oo kaashanaya Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda iyo daneeyayaasha kale, ayaa salka u dhigay kuna guulsaytay inay xasiliyaan isku bedelka shillinka Somaliland iyo Doolarka Maraykana, isla markaana saamaynta uu samaynayey ay yarayd laga soo bilaabo March 2019-kii.


Dhinaca kale Bangigga Somaliland iyo Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu waxa ay saadaalinayaan in sarrifka shilinka ee Doolarka maraykanka lagu hayn doona 8,000 ilaa 8,500 SLSH/USD, oo ah siyaasadda bangiga somaliand ee maamulidda sarrifka Lacagta.

SHAXDA 5: Isbarbardhigga Xadiga Sarrifka Shilinka Somaliland iyo Doolarka Oo Rubucle ah (Jan-June 2021-2022)

| Sadex-biloodka | 2021 | | 2022 | | Sanadba sanadka ka dambeeya (YOY%) |
|--------------------|--------------|-------|--------------|-------|------------------------------------|
| | Sarrif | % | Sarrif | % | |
| Sadexbiloodka 1aad | 8,473 | -0.9% | 8,515 | -0.6% | 0.5% |
| Sadexbiloodka 2aad | 8,527 | 0.6% | 8,476 | -0.5% | -0.6% |
| Celcelis | 8,500 | | 8,496 | | -0.1% |



Jaantuus 4: Heerka Sarifka Shilinka Somaliland iyo Doolarka iyo Heerka Sicir-bararka oo bille ah (Jan-june 2021-2022)




4.3 Xawaaladaha

Iyada oo laga duulayo xogta laga soo uruuriyey 4 bangi oo waaweyn iyo 17 Xawaaladood oo ku yaala Somaliland, waxa ay sheegaysaa in lacagaha la soo xawilay lix biloodkii hore ee sanadkan 2022 ay ka yar yiniin 8% marka loo eego lacagihii la soo xawilay lix biloodkii hore ee sanadkii 2021. Dhinaca kale lacagaha dalka laga xawilay ay kordheen 33% sanadkan 2022, marka loo eego lacagihii laga xawilay lix biloodkii hore ee sanadkii 2021.

Marka haddaba lagu saleeyo xogta lix biloodka hore, waxa la filayaa in sanadkan 2022 inta ka hadhay ay Lacagaha la soo xawilayaa sidaa sii ahaan doonaan oo ka yaraan doona lacagihii la soo xawilay sanadkii hore ee 2021. Halka lacagaha dalka laga xawilayaa iyaguna ka badnaan doonaan kuwii la xawilay sanadkii hore ee 2021, sababta arintaa badnaanshiyaha keenaysaana ay tahay qiimaha alaabta lagu soo iibinayo oo ka qaalisan sanadkan 2022 kii lagu soo iibinayay sanadkii hore ee 2021.



Jaantuus 5: Xawaaladaha Lacagaha la soo diray iyo kuwa laga diray Somaliland oo Rubucle ah (2019-2022 US Millions)



IL-wareed: Bangiga Dhexe ee Somaliland

4.4 Ganacsiga

4.4.1 Dhoofinta Xoolaha


Tirada xoolaha ee dhoofay lix biloodkii hore ee sanadkan 2022, waxa ay dhan tahay 1,517,038 oo neef, waxay 26% ka badan yihiin tiradii xoolaha dhoofay lix biloodkii hore ee sanadkii 2021 oo ahaa 1,207,334 oo neef. Sida uu tilmaamayo jaantuska 7aad ee hoose, idaha iyo riyaha ayaa markasta ugu badan xoolaha Somaliland laga dhoofiyo. Intii u dhaxaysay bilihii Jan ilaa June 2022, xoolihii dhoofay oo ahaa 1.5 milyan, idaha iyo riyuhu waxa ay ka ahaayeen 94.3% halka ay sanadkii 2021 xiligaas oo kale ka ahaayeen 93.6%. lo'da iyo geeluna waxa ay ahaayeen 3.9% iyo 1.8% sida ay u kala horeeyaan.

SHAXDA 6: Is-barbardhiga Wadarta Tirada Xoolaha Dhoofay oo Rubucle ah Sanaddaha (2020, 2021, 2022)

| Xoolaha | Rubuc | 2020 | 2021 | 2022 | % Isbedel 2020 | % Isbedel 2019 |
|-------------------------|---------------|---------|-----------|-----------|----------------|----------------|
| Dhoofka Geela | R1 | 2,451 | 12,855 | 16,486 | 424% | -33% |
| | R2 | 19,180 | 7,550 | 10,639 | -61% | -54% |
| | Wadar Jan-Jun | 21,631 | 20,405 | 27,125 | -6% | -43% |
| Dhoofka Lo'da | R1 | 32,694 | 33,262 | 25,575 | 2% | -9% |
| | R2 | 21,266 | 23,841 | 34,104 | 12% | -25% |
| | Wadar Jan-Jun | 53,960 | 57,103 | 59,679 | 6% | -17% |
| Dhoofka Idaha & Riyaha | R1 | 146,094 | 365,413 | 368,016 | 150% | 190% |
| | R2 | 246,524 | 764,413 | 1,062,218 | 210% | 455% |
| | Wadar Jan-Jun | 392,618 | 1,129,826 | 1,430,234 | 188% | 329% |
| Wadarta Dhoofka Xoolaha | R1 | 181,239 | 411,530 | 410,077 | 127% | 126% |
| | R2 | 286,970 | 795,804 | 1,106,961 | 177% | 328% |
| | Wadar Jan-Jun | 468,209 | 1,207,334 | 1,517,038 | 158% | 228% |



Jaantuus 6: Wadarta Xoolaha Dhoofay oo Bille ah (2019-2022)



II Wareed: W/H/Maaliyadda

4.4.2 Soodejinta I

Ka dib hoos-u-dhac ku yimi qiimaha dhabta ah ee soodejinta sannadihii 2019 iyo 2020 oo kala ah 2% iyo 9%, soodejintu waxa ay korodhay 3% sannadkii 2021. Saadaalinta koritaanka soodejintu ma aha mid toobiye toosan loo raaci karo; helitaanka xogta iyo tayadeedu weli waa mid hoosaysa Somaliland. Wasaaraddu waxa ay filaysaa in wadarta guud ee soodejintu xoogaa is dhimi doonto 2022. Waxa sabab u noqon karta Jaadka ama Qaadka laga keeno Ethiopia oo qiimihiisu kor u kacay oo keenay in xaddiga soogelintiisu isdhinto. Iyada oo la filayo in baahida soodejinta badeecad beddesha tii ku shufbeeshay dabkii Waaheen, haddana sicirka sare ee badeecadda ayaa saamayn taban ku yeelan karta mugga soodejinta. Xaaladda rajogelinta marka lagu eego, soodejinta waxa la filayaa inay isdhinto 3% 2022, ka hor inta aanay muddada dhexe u hinqan 6% iyada oo laga dheehanayo sida haatan wax u socdaan. Aragtida taxadarka leh, qiimaha sare ee soodejinta ayaa wax u dhimmi doona mugga soodejinta ilaa 5% sannadka 2022, halka uu sannadaha 2023 iyo 2024 ka kala noqon doonto saamayntaasi 2% iyo 6%.

SHAXDA 7; Qiimaha Alaabta soo Degtay Jan-June 2022


| Nooca Alaabta | Qiimaha Alaabta (S.L.sh) | % Wadarta Alaabta | Cashuurta (S.L.sh) | % Wadarta Cashurta |
|-------------------------|--------------------------|-------------------|--------------------|--------------------|
| Cuntada qasaacadaysan | 899,811,379,627 | 45.4% | 242,259,272,30 | 29.9% |
| Oleaginous* | 202,226,599,173 | 10.2% | 207,891,899,64 | 25.7% |
| Shidaalka iyo Gaadiidka | 193,341,017,553 | 9.8% | 96,216,430,340 | 11.9% |
| Shopping's | 244,106,915,288 | 12.3% | 97,380,682,793 | 12.0% |
| Qalabka Dhismaha | 284,649,817,030 | 14.4% | 97,693,576,095 | 12.1% |

¹ Soodejinta qiimayaal aan isbedelin ayaa loo gooyey Somaliland – taas oo macnaheedu yahay in qiimayaashu Buugga Qiimayntu aanu isbedel ku iman doonin sannadka. Waxa intaa dheer in qiimayaaasha ku qoran USD ee Buugga dib loogu qiimeeyey heerka Rasmiga ah ee Dawladda u degsan.



| | | | | |
|------------------------|-------------------------|---------------|-----------------------|---------------|
| Qlalabka Electarooniga | 121,452,061,278 | 6.1% | 47,514,260,637 | 5.9% |
| Inta kale | 36,640,283,905 | 1.8% | 20,064,980,031 | 2.5% |
| Grand Total | 1,982,228,073,85 | 100.0% | 809,021,101,80 | 100.0% |

Jaantuus 7: Koritaanka Heerka iyo Qiimaha Wax-soodejinta Somaliland ee Xaaladaha Kala duwan ee Muddada Dhexe



SHAXDA 8: Xaaladaha Koritaan ee Muddada Dhexe ee Wadarta Qiimaha Wax-soodejinta

| Xaalad | 2019a | 2020a | 2021a | 2022f | 2023f | 2024f |
|------------------------------|-------|-------|-------|-------|-------|-------|
| Koritaan (%) | -2% | -9% | 3% | | | |
| Xaalad 1 (Rajogelin) | | | | -3.0% | 6.0% | 6.0% |
| Xaalad2 (Taxadar leh) | | | | -5.0% | 2.0% | 6.0% |

* a = actual, f = forecasted



5 Shaqaalaysiinta Dawladda 2018 ilaa 2023

Sida ka muuqata shaxda 9aad, Laga soo bilaabo 2018 tirada Shaqaalaha Dowladda Dhexe waxay kordheen 9,560 qof, una dhiganta (55%), marka la eego cel-celiska (Average) tirada shaqaaluhu kordhayaan shantii sano ee u dambaysay waxay ahayd (8%)

Tani waxa ay ka tarjumaysaa heerka Adeeg kordhinta iyo fursadaha shaqo abuur ee ay Dowladdu Samaysay shanti sano ee u dambaysay.


Korodhka tirada shaqaalaha meelaha laga xusi karo waxa ka mid ah:

- Dhalinyaradii lagu shaqaaleeyay Mashruuca Shaqo qaran
- Shaqaalaysiintii shaqaalihii ku meel gaadhka ahaa ee Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Dowladda
- Kordhinta shaqaalaha Caafimaadka
- Kordhinta shaqaalaha Waxbarashada (macalimiinta
- Iyo korodhka guud ee shaqaalaha Wasaaraddaha iyo Hay'addaha

SHAXDA 9: Shaxda Korodhka Tirada Shaqaalaha Dowladda Dhexe ee 2018 ilaa 2023

| Sannadka | Shaqaalaha | Isbedelka % |
|----------|------------|-------------|
| 2018 | 17,240 | |
| 2019 | 18,838 | 9% |
| 2020 | 20,805 | 10% |
| 2021 | 23,686 | 9% |
| 2022 | 24,508 | 3.40% |
| 2023 | 26,800 | 9% |

Jaantuus 8: Shaxda Korodhka Tirada Shaqaalaha Dowladda Dhexe ee 2018 ilaa 2023



Il wareed: Wasaaradda H.Maaliyadda




6 CIMILADDA

6.1 ROOBABKA DA'AY 2022

Sida uu muujinayo jaantuska 9aad ee xagga hoose, rubucii labaad ee sanadkan 2022, qaar ka mid ah gobolada dalka sida, Awdal iyo Maroodi-jeex, waxaa helay roobab wanaagsan, halka gobolada kale badankooda uu roobku aad ugu yaraa. Borama ayuu helay roobka ugu badan isaga oo ka badnaa 155mm, waxa ku xigay Gebiley oo heshay 152mm, halka Salaxley ay ahayd magaalada ugu roobka yar 15mm. Guud ahaan dalku lixdii bilood ee hore sanadkan 2022 roobka helay aad ayuu u yaraa marka loo eego sanadadii hore ee dhawaa. Waxa la rajaynayaa insh allah lix biloodka danbe ee sanadkan 2022 iyo sanaddada ka danbeeyaba in dalku helo roobab badan, si dadka, beeraha iyo xooluhuba uga soo kabtaan abaaraha hadda jira ee dabo dheeraaday, xaaladdanu u hagaagto.

Jaantuus 9: Roobabka Da'ay 2022



Il-wareed: Wasaaradda Horumarinta Beeraha




7 WARBIXINTA HAB-SAMI U SOCODKA MIISAANIYADDA 2023

7.1 Soo jireenka warbixinta wax-qabadka Miisaaniyadda

Dawladda Somaliland waxay sannadihii u dambeeyay si joogto ah u horumarinaysay uruurinta dakhliga iyo kharash-galka dowladda. Uruurinta dakhliga dhabta ah iyo kharashaadka dowladda ayaa si joogto ah u kordhayay sanadba sanadka ka dambeeyey. Marka loo eego si sannad-sannad ah, dakhliga dhabta ah iyo kharash galka dowladda laga soo bilaabo sannadkii 2014 waxay kordhayaan celcelis ahaan 6%. Sidaa darteed, dawladdu waxay si joogto ah ugu soo dhawaatay inay gaadho bartilmaameedkeeda dakhli ururuunta ee miisaaniyadda. Marka la eego dhanka kharash-galka dowladda, hoos u dhac waxoogaaya ayaa ka muuqday gaar ahaan sannadadii 2017 iyo 2018 oo mid waliba uu yoolkii kharash galkii la filayey ka hooseeyay 8.4% iyo 9.3%, taas oo ay ugu wacnayd abaarihii darnaa ee inagu dhacay sanadahaas.

Jaantuus 10: Odoraska Dakhliga iyo Dakhliga dhabta ah ee Sannadaha 2017-2020



7.2 Dakhli Uruurinta Jan-June 2022

Lixbiloodka hore ee 2022, dawladda Somaliland waxa ay ururisay **SIShs 1.132 trillion** oo u dhiganta korodhsiimo dhan 6% marka la barbar dhigo isla wakhtigaa sannadkii hore. In kasta oo korodhku sidiisii hore u kacayey si sannadle ah, haddana waxa muddan in la xuso in ururintu ka waabsanayd bartilmaameedkii loo dhigay sannadkan. Dakhliga guduhu waxa uu dhammaa **SIShs 72.8 billion**, oo la mid ah -6% in uu ka yar yahay yoolkii loo dejiyey muddadaa. Sida hore loo soo sheegay, siyaadaha maaliyadeed ee la qaatay sannadka intiisa hore (sida cashuur-dhaafka 10% loo sameeyey waxyaabaha qutul daruuriga ah sida Raashinka, oo Xukuumadu uga gol lahayd xakamaynta sara u kaca sicir-barbarka Alaabta iyo dhinaashaha ku imid soo-gelitaanka qaadka Ethiopia ka imanayey ayaa saamayn taban ku yeeshay dakhli-ururinta. Jaantus 12aad ee hoose ayaa tilmaamaya walxaha badiba lala xidhiidhiyey hoos-u-dhaca dakhliga ee ka hooseeyey yoolka. Sida muuqata, cashuur-ururinta ka dheegantay waxsoodejinta waa ay ka hooseysaa in badan ku-talo-galka (waxay ka hooseysa ilaa SIShs 63 bilyan). Meelaha kale ee hoos u dhacu ka muuqdo waxa ka mid ah Cashuuraha



Agabka, baabuurta, iwm., diiwaangelinta qandaraasyada, 2% cashuuraha loo qaado Gobollada bari, iyo cashuurta horumarinta waddooyinka oo isku darka hoosu u dhacoodu dhammaa SIShs 22.7 bilyan. Taa dhigeeda, dhawr shay ayaa iyana ka kor maray yoolkii loo dejiyey sida: cashuurta dhoofka xoolaha, ganaaxyada, cashuurta diiwaangelinta hantida, fiiga/dakhliga isticmaalka dekedaha, iwm.


Wadarta dakhli ee ay soo xereeyeen waaxaha kastamada iyo Cashuuraha berriga ayaa 98% ka ah dakhliga soo xerooday, iyada oo Waaxda Kastamadu keligeed soo hoysey 75% dakhligaa. Sidaas oo ay tahay, Waaxda Kastamadu waxa ay ka hoos martay ku-talo-galkii u astaysnaa -8% oo u dhiganta SIShs 73.6billion, halka Waaxda Cashuuraha Berrigu yoolkeedii ka kormartay 3% oo u dhiganta SIShs 7.6 bilyan.

SHAXDA 10: Dakhli Ururinta dhabta ah oo la barbardhigay Odoraska Miisaaniyadda SLSH (Jan-June 2022)


| Faallo | Odoroska Miisaaniyadda (Sannadle) | Odoroska Miisaaniyadda (Ilaa hadda) | Dakhli-ururinta dhabta ah (Ilaa Hadda) | Faraq | % |
|--|---|---|--|------------------------|------------|
| Cashuuraha | 2,269,328,107,555 | 1,134,664,053,778 | 1,063,085,951,860 | -71,578,101,918 | -6% |
| Dakhliga & Faa'iidada | 52,874,027,856 | 26,437,013,928 | 28,107,703,676 | 1,670,689,748 | 6% |
| Mushaharka & Shaqaalaha | 122,276,223,424 | 61,138,111,712 | 63,612,564,027 | 2,474,452,315 | 4% |
| Agabka & Adeegyada | 804,664,152,211 | 402,332,076,106 | 380,884,944,267 | -21,447,131,839 | -5% |
| Cashuurta libka | 307,547,982,843 | 153,773,991,422 | 152,356,210,392 | -1,417,781,030 | -1% |
| Cashuurta libka/Dadban | 38,664,481,505 | 19,332,240,753 | 9,609,513,303 | -9,722,727,450 | -50% |
| Cashuurta Diiwaangelinta | 78,108,698,238 | 39,054,349,119 | 36,807,474,711 | -2,246,874,408 | -6% |
| Cashuuraha Kale ee A&A | 380,342,989,625 | 190,171,494,813 | 182,111,745,861 | -8,059,748,952 | -4% |
| Ganacsiga Caalamiga ah | 1,185,087,774,357 | 592,543,887,179 | 542,518,424,727 | -50,025,462,452 | -8% |
| Cashuuraha Soodejinta | 1,011,598,891,045 | 505,799,445,523 | 442,701,478,649 | -63,097,966,874 | -12% |
| Cashuuraha Dhoofinta | 70,631,134,500 | 35,315,567,250 | 50,751,109,701 | 15,435,542,451 | 44% |
| Cashuurtaha Dekedda | 102,857,748,812 | 51,428,874,406 | 49,065,836,377 | -2,363,038,029 | -5% |
| Cashuuraha Kale | 104,425,929,707 | 52,212,964,854 | 47,962,315,163 | -4,250,649,691 | -8% |
| 2% Loo Gooyo Gobollada Bari | 104,319,189,627 | 52,159,594,814 | 47,906,280,163 | -4,253,314,651 | -8% |
| Kale | 106,740,080 | 53,370,040 | 56,035,000 | 2,664,960 | 5% |
| Dakhli Kale | 137,274,786,780 | 68,637,393,390 | 67,265,595,513 | -1,371,797,877 | -2% |
| Macaashmacaashka Hantida | 35,907,734,418 | 17,953,867,209 | 17,849,843,400 | -104,023,809 | -1% |
| Gadidda Agabka & Adeegyada | 92,288,419,608 | 46,144,209,804 | 41,594,923,355 | -4,549,286,449 | -10% |
| Ganaaxa & Lacagwareejinta | 9,078,632,754 | 4,539,316,377 | 7,820,828,758 | 3,281,512,381 | 72% |
| Wareejinta aan meelo kale lagu sheegin | 3,850,000,000 | 1,925,000,000 | 2,100,000,000 | 175,000,000 | 9% |
| WADARTA | 2,410,452,894,335 | 1,205,226,447,168 | 1,132,451,547,373 | -72,774,899,795 | -6% |



Jaantuus 11: Shanta shay ee ka kormaray Odoraska iyo Shanta shay ee ka hoos maray Odaraskoodii (Jan-June 2022)




Jaantuus 12: Wadarta Dakhli Ururinta Jan-June iyo Hay'addaha ka Masuulka ah (Billions SLSH)





Jaantuus 13: Dakhli-Ururinta Kastamada (Bidix) iyo Cashruuraha Berriga (Midig) oo goobaysan (Jan-June 2022)



7.3 Kharash-galka Dowladda Jan-June 2022

Lixbiloodka hore ee 2022, dawladdu waxa ay ka kharashgaraysay miisaaniyadda guud SIShs 1.056 tirilyan, taas oo u dhiganta inay **15%** ka badan tahay kharashgalkii ahaa SIShs 918 bilyan ee xilliga xilligisii kal hore. Marka loo eego qoondada loogu talo galay inay baxdo Jan-June waxa ay ka dhigan tahay in **13%** oo u dhiganta SIShs 160 bilyan kharashgalku ka hooseeyo yoolkii la dhigay, una eg gaabiskii ku yimi kharashgalkii kal hore oo dhammaa 12%, una dhiganta SIShs 126 Bilyan.


Jaantus 16 ee hoose waxa uu muujinayaa kharashgalka dawladda oo rubucle ah ilaa 2019. Sida muuqata, kharashgalka dawladda ee nuska hore ee sannadka 2022, waxa uu aad uga badan yahay wakhtiyadii la midka ahaa ee sannadihii ka horreeyey. Waxa intaa dheer in kharashgalka rubuca labaad isaguna in weyn ka badan yahay rubuca kowaad (41%) – taas oo u eg sida soo jireenka ahaan jirtay.

Marka la eego sida waxqabadka iyo qoondadu isu dabooleen nuska hore ee sannadka, kharashgalku waa ka yaraa sidii yoolku ahaa qaybaha oo dhan, marka laga reebo mushaharsiinta/xaqsiinta shaqaalaha (-2%) iyo kabka (-9%) sida ku cad Jaantus 17. Marka dhanka Wadaagayaasha loo eego, ammaanka, maamulwanaagga iyo Deegaanka ayaa ula jirsaday yoolka 10% dhinaca kharshgalka, halka wadaagyada hadhay sida Biyaha iyo Tamarta ay aad uga hoos mareen bartilmaameedka kharashgalka sida ka muuqata Jaantus 16.




Marka la barbardhigo wakhtiga la midka ahaa ee 2021, kharashgalka isticmaalka Mashaariicda Dawladda, Hantida, Deeqaha iyo Qaanbaxu aad ayuu uga hooseeyey qoondada sida ka muuqata Jaantus 14.

Jaantus 14: Kharash-galka Dowladda oo Sadexbilood leh ah (2019-2022, Billions SLSH)




Jaantus 15: Soo Koobida Kharash-galka Dowladda ee Qeybaha Waaweyn (Jan-June 2022) oo aanay ku jirin Deeqaha Banggiga Adduunku, Billions slsh






Jaantuus 16: Kharash-galka Dowadda ee Jan-June oo Wadaagaysan



Jaantuus 17: Isbarbar-dhiga soo koobida Qeybaha Waaweyn kharashgalka Dowladda ee Sadexbiloodka labaad (2021-2022)




7.4 Kharash galka Mashaariicda Bangiga Adduunka ee Jan-June 2022

Halka abaabulka dakhli-ururinta gudaha iyo kharashgalka sanduuqa guud ee dawladda laga sameeyey horumar sannadihii dhowaa ee inna dhaafay, fulinta miisaaniyadda ee saddexda mashruuc ee Bangiga Adduunku maalgeliyo waa ka hooseeyeen yoolka. Sannadka 2022 nuskiisii hore, waxa dawladdu ka heshay Bangiga adduunka SIShs 16.8 Bilyan, waxana ay gelisey mashaariicda DRP/PFM, CSSP, CSSPII iyo SEAP SIShs 12.9 bilyan oo u dhiganta inay ka hoos martay qoondadii kharashgalka 23%. Sida ku cad Jaantus 19, mashaariicdani taariikh ahaan mar walba waa ka hoos marayeen miisaaniyadda loogu talo galay. Soogadidda hantida iyo adeegyada qiimaha sare leh ayaa inta badan caqabado ku ah




mashaariicda. Marka la eego filashada in weji labaad Bangiga Adduunka mashaariicdiisa lagaga heshiyo, wax-ka-qabashada caqabadahan waa in mudnaan dheeri ah la siiyo si looga faa'iidaysto maalgelinadan

Jaantuus 18: Dakhliga iyo Kharashgalka Mashaariicda uu Bangiga Adduunku Maalgeliyo inta u dhaxaysay Jan-June 2022, Billions



Jaantuus 19: kharashgalka Mashaariicda Banggiga Adduunka ee Sanadadda (2020-2021)



7.5 Warbixinta Mashaariicda 2% Horumarinta Gobolada Barri ee 2022

Sida aan ka war hayno, waxa dowladdu Miisaaniyadda uga qoondaysaa kharash gaara oo loogu talo galay in lagu horumariyo Gobolada Barri gaar ahaan Sool iyo Sanaag, taas oo sanadadii ugu dambaysay laga fuliyay Goboladaas Mashaariic Horumarineed oo wax ku Oola, Bulshada Deegaanadaasina aad u soo dhaweeyeen.

Mashaariicda Horumarineed ee laga fuliyay Goboladaasi waxay isugu jiraan sidan hoose:



- Dhisme Dugsiyo
- Dhismayaal MCH
- Dhismayaal Wadooyin
- Dhismayaal Saldhigyo Boolis
- Dhisme Jaamacadeed
- Iyo fidinta Maamulka Dowladda

Marka la eego Mashaariicda loo qorsheeyay inay baxdo Sanadka 2022 waxay ahaayeen 19 Mashruuc , waxa ilaa hada la sii daayay 14 Mashruuc, kuwaas oo intooda badan dhamaaday inta hadhsana la filayo inay baxdo ka hor inta aan sanadku dhamaan, waaana kuwan mashaariicdu hoos ku xusan

- Dhismaha deyrka Dugsiga Gawsaweyne
- Mashruuca Masterplan-ka Magaalada Ceerigaabo
- Dhismaha Rugta Booliska Bohol
- Dhismaha Wadadda tabca
- Iibsiga Mishiinka laydhka Maydh
- Dhismaha Dugsiga iyo malcaabad quraanka Marwada
- Dhismaha Xafiiska Maamulka Yube
- Dhismaha waardhka Dhahar
- Dhismaha sariibada Carmala
- Dhismaha deyrka Dugsiga Xudun
- Dhismaha Jaamacada Laascaanood
- Ka qeyb qaadashada Dhismaha waddada isku xidha kala baydh iyo sool
- Dhismaha deyrka Cusbataalka Ceerigaabo
- Dhismaha saldhiga booliska Laasasurad
- Dhismaha Cusbataalka Ceel afweyn
- Xiis
- Dhismaha MCH-ka Caynabo
- Dhismaha Deyka qalcada
- Dhismaha jaacada Buuhoodleh

7.6 Casriyeynta iyo hirgalinta Cutubtyada kale duwan ee SLFMIS-ka

Waxa sanadba sanadka ka dambeeyey si xawliya ah loo horumarinayey Nidaam Xisaabeedka Maamulka Maaliyada ee (Public Financial Management), taas oo wasaaradu dedaal baban muujiysay isla markaana hirgalisayna inay qaybo badan oo adeega Maamulka Maaliyadda u bedesho hab Elelronic ah, taas oo kor u qaaday isla xisaabtankii, daahfurnaantii iyo shaqo wanaagii

Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu iyada oo ka duulaysa waxtarka ay leedahay tiknoolajiyaddu waxa ay hirgalisay adeegsiga nidaamyo ku dhisan IT-ga kuwaas oo ay u adeegsadaan waaxaha iyo qaybaha kala duwan ee wasaaradu hawl maalmeedka shaqo ee ay u hayaan qaranka.

Dhamaadkii sannadkii 2018, Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda waxay bilowday adeegsiga nidaamka maaraynta xogta maaliyadeed ee loo yaqaan SLFMIS-ka (Somaliland Financial Management Information System) oo ah nidaam calaami ah, dhamaana dawladdaha dunidu ku maamulaan xogtooda maaliyadeed.



Bishii May 2018, waxa Wasaaradda horumarinta Maaliyaddu hirgalisay nuquladdii ugu horeeyay ee aasaasiga u ah nidaamkan, kuwaas oo lagu fuliyay dhamaan Wasaaraddaha iyo Hay'adaha dawladda. Nuquludaas lagu bilaabay ayaa kala ahaa:

7.6.1 Nuqulada kala duwan ee la hirgaliyey tan iyo markii la hirgaliyey Nidaamka SLFMISK-ka

7.6.1.1 Qeybta Qoondada saddex biloodka ah (Expenditure Warrant)

Qeybtan ayaa loo adeegsadaa in lagu maamulo qoondada saddex biloodka ee wasaarad ama hay'ad leedahay. Waxa kale oo loo isticmaala Qeybtan kala wareejimaha miisaaniyadda. Qeybtan ayaa suurta galinaya in aan wasaarad ama hay'ad dawlada ka tirsani aanu dhaafin karin qoondadii loogu talo galay iyo guud ahaan miisaaniyaddii ay lahayd

7.6.1.2 Qeybta Maamulka Kharash Bixinta (Expenditure Voucher)

Qeybtan kharash bixinta ayaa isna lagu maamulaa hannaanka kharash bixinta dawladda oo ka soo bilaabanta Wasaaradda ama hay'adda kharashka bixinaysa marka ay hesho waraaqda qaansheegta meheredda. Wasaaradda ama hay'adu waxay abuurta foorjarka kharash bixinta taas oo marta jaran kala oo ansixin ah. Qeybtan waxa uu suurto galiyay:

- In la helo isla xisaabtan cad oo ku salaysan miisaaniyadda qaranka.
- Kor u qaadida daah-furnaanta miisaaniyadda dawladda.
- Waxa uu soo koobay wakhtigii lagu qabanayay shaqadda.
- Wuxuu kor u qaaday saxnaanta xogta iyo in uu yareeyo khaladaad dhici jiray markii hore.
- Waxa u ku wargaliyaa muwaadiniinta adeega u qabta dawladda hadba halka uu marayo lacag siintoodu isaga oo u diray fariin SMS ah.

7.6.1.3 Qeybta Dakhli Qabashada (Revenue Collection)

Qeybtani waa ka loo adeegsado dakhli ururinta waxana uu sahlay in si fudud loo qabto dakhliga laga qabtay cashuur bixiyaha isaga oo isku xidhaya xafiisyadda kala duwan ee ku hawlan ururinta, hubinta iyo kaydinta dakhliga.

7.6.1.4 Qeybta Xisaab Xidhka (Financial Reports)

Qeybtani waxa uu soo bandhigaa warbixinaha kala duwan ee la xidhiidh miisaaniyadda wadanka ee ka kooban dakhli iyo kharash, waxana uu siiyaa madaxda wasaaraddaha xogta maaliyadeed isla wakhti xaadirka la taagan yahay. Qeybtan waxa uu hawl yareey diyaarinta xisaab xidhka oo markii hore wakhti dheer qaadan jirtay.

Bishii Jul 2019 nuquladda kor ku xusan waxa lagu fidiyay dhamaan xarumaha gobollada waxan la tobararay shaqaalaha iyo isu-duwayaasha gobollada ee wasaaraddaha iyo hay'adaha dawladda, xisaabiyayaasha guud ee gobollada iyo shaqaalah cashuurahaha ee kastamadda iyo cashuuraha berriga. Nuqulladaasi waxay noqdeen kuwo si dhamaystiran looga adeegsado dhamaan dalka dhinaca dakhli qabashada iyo kharash bixintaba.

7.6.1.5 Qeybta Diyaarinta Miisaaniyadda (Budget Preparation Mutual)

Bishii Sep 2019, Wasaarada Horumarinta Maaliyaddu waxay daahfurtay hirgalinta Qeybta diyaarinta miisaaniyadda oo wasaarad iyo hay'ad kasta sannadkii hal mar u adeegsato diyaarinta qorshahooda miisaaniyadeed. Qeybtani waxa si fudud looga daabacayaa buuga miisanayadda oo markii hore diyaarintiisu awood iyo wakhti u ugali jiray.



7.6.1.6 Qeybta Diyaarinta Mushaharka (paryol Matual)

Feb 2020, Qeybta Mushaharka Shaqaalaha ayaa lagu tababary dhamaan xarumaha dhexe ee wasaaradaha iyo ha'yadaha dalka. Qeybtani ayaa u jeedadiisu tahay in lagu diwaan galiyo xogta dhamayska tiran ee dhamaan shaqaalaha dawladda, mushaharaadkooda iyo gunnooyinka ay qaataan ugu dambayna lagu diyaariyo mushaharka billaha ah ee shaqaalaha dawladda.

Qeybtan ayaa fududeeyay in sahal ah loo helo xogta shaqaalaha ee la xidhiidha mushahar bixinta waxana uu casiriyeeyay mushahar qaadashada isagoo oo isticmaalaya adeega E-Shilling ee bangiga dhexe kaas oo u suurta galinya qofka shaqaalaha in uu helo mushaharkiisa isagoo oo adeegsanaya mobilkiisa isla markaana ku soo nuugaya Zaad ama E-dahab kii uu doono.

Jun 2020 Qeybtan waxa laga balaadhiyay goboladda dalka oo si toos looga adeegsaday Qeybtan mushahar diyaarinta.

7.6.1.7 Qeybta Iibka (Purchase Matual)

Bishii October 2020, waxa si tijaabo ah loogu fuliyay Qeybta iibka wasaaradda Maaliyadda saddex bilood oo tijaabo ah ka dibna waxa lagu baahiyay adeegaas dhamaan Wasaaraddaha iyo hay'adaha dawladda.

Qeybtan ayaa ka kooban hawlahaan hoos xusan:

- codsiga alaabta oo ka soo bilaabmayaa waaxda iibka samaynaysa, ogolaanshaha codsiga
- ka dib waaxda/qaybta iibka ayaa abuuraysa dalabka alaabta iyadoo tixraacaysa codsiga iibka una gudbinaysa meheradda ama adeeg bixiyaha. Marka ogolaanshaha ugu dambeeya uu helo dalabka iibku, Faaiidada uu Qeybtani keenay waxa ka mid ah in uu abuuray balanqaad (Commitment). Balanqaadkaas oo lacagta u haynaya iibkaas inta laga gudoomayo ka hortagaya in ay abuuranto day naan loo baahnayn.
- Alaabta la iibsaday marka keeno ama adeega la qabtay dhamaado, waxa la abuurayaa gudoonka alaabta oo ku xidhan dalabkii hore loo diray. Hubin iyo ansixin ka dib waxa loo gudbayaa kharash bixinta oo ku lifaaqan dalabkii iibka

7.6.1.8 Warbixinaha IPSAS (IPSAS Reports)

Bishii Feb 2021, waxa system-ka lagu diyaariyay warbixinaha caalamiga ah ee loo yaqaano IPSAS Reports (International Public Sector Accounting Standards) warbixinaha oo sahlay in si fudud loo helo warbixinaha maaliyadeed ee loo baahan yahay iyagoo waafaqsan istandarka ay dajisay IPSASB.

7.6.1.9 Qeybta diiwaan galinta hantida raagta (Asset Registration Matual)

Bisha Jul 2021 Wasaaradu Maaliyaddu waxa ay bilowday hirgalinta Qeybta diiwaanta galinta hantida raagta ee dawladda. Qeybtan ayaa fududuayna q hawlahaan qabashada hawlahaan hoos ku xusan:

- Diiwaan-galinta Hantida Raagta: Guddi loo magaacabay diiwaan galinta hantida ayaa ka hawl galay sidii loo diiwaan galin lahaa dhamaan hantida raagta ee dawladda oo ay ka mid yihiin Dhulka, Dhismaha, Qalabka, Gadiidka IWM. Lixdii bilood ee ugu dambeeyay sannadka 2021 waxay ku soo dhamaystireen hantid raagta ee wasaaradaha iyo hay'adaha dawladdu ay ku leeyihiin gobolka Maroodijeex.
- Sumaydanta Hantida Raagta: Hanti kasta oo ay leedahay dawladdu waxa ay yeelanaysa sumad u gaar ah oo muujinaysa halka taalo, cida ka masuulka, goorta la soo iibiyay, miisaniyada laga soo iibiyay iwm. Shaqadaas oo imika bilowgeedii gacanta lagu hayo.
- Wax ka bedelka xogta hantida: hawshan waxa ay suurto galinaysaa is fudud loo badeli karo xogta hantida marka laga wareejinayo cidii ka masuulka ahayd ama goobtii ay taalay laga qaado ee loo raro goob kale.
- Hubinta Hantida Raagta: hawshan waxa ay suurto galinaysaa dabogalka iyo in la soo taabto hantida diiwaan gashan lana ogaado Hantida maqan, ta xumaaday ama duugawday iwm.
- Duugowga Hantida: Hantida waxa la adeegsanay sannadkiiba mar marka la diiwaan galinyo duugowga alaabta iyada la raacayo qaacida duugowga hantid dawladda.
- Khashin Saarka Hantida (Asset Disposa). Hantida duugowgeed dhamaado waa la khashin saaraya iyadoo la raacayo siyaasadda hantida raagta.



7.6.2 Nidaamyada kale ee Dowladda ee ay isku xidhmeen Nidaamka SLFMIS

Labadii sano ee u dambeeyey waxa horumar weyn laga sameeyay isku xidhka nidaamka SLFMIS-ka iyo nidaamyada kala ee ay isticmaalaan Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Dowladdu, kuwaas oo ay ka mid yihiin:

1. Nidaamka Bangiga Dhexe
2. Nidaamka Cashuuraha ee ITAS
3. Nidaamka Kastamda
4. Nidaamka diiwaan galinta liisamada ee Wasaaradda ganacsiga
5. Nidaamka bixinta Visaha ee xafiiska socdaalka
6. Nidaamka bixinta kaadhka shaqada ee Wasaaradda shaqadda.
7. Nidaamka Fariimaha ee shirkadaha isgaadhsiinta.



8 Miisaaniyada Dowladda Dhexe 2023

8.1 Siyaasadaha Miisaaniyadda 2023

8.1.1 Siyaasadda Maaliyaddeed (fiscal policy)

8.1.1.1 Isku dheeli tirka Dakhliga iyo kharashka

Siyaasadaa Miisaaniyadda ee 2023 waxay xooga saaraysaa in la isku dheeli tiro Dakhliga iyo kharshaka. Taas oo macnaheedu yahay in miisaaniyadda 2023 lagu sargooyo Dakhliga dhabta ee la filayo Sannadka 2023 , iyadoo laga shidaal qaadanayo Dakhliga dhabta ah ee ina soo galay **Jan-Sep 2022**, Taas oo ujeedadeedu tahay in dawladdu ku xisaabtanto qoondadda dakhli ee filashadeedu hooseeyso, si looga baaqsado dheeli ku yimaadaa kharash galka iyo dakhli ururinta.

8.1.1.2 Kor u qaadida saamiga ay Cashuuraha berrigu ka yihiin Dakhliga guud

Siyaasada Miisaaniyadda ee 2023 waxay xooga saaraysaa in kor loo qaado saamiga Dakhliga Cashuuraha berrigu ka yihiin Miisaaniyadda guud iyada oo xooga la saari doono sal-balaadhinta Qeybaha Cashuuraha Berriga (Tax Base), adeegsiga tiknoolajiyadda, yareynta wakhtiga iyo talaabooyinka cashuur bixinta, fulinta ganaaxyadda iyo ciqaabaha cashuur diidka, Diiwaan-galinta dhamaan Cashuur Bixiyayaasha iyo dardar galinta Cashuuraha Adeega iyo Alaabta ee (GST-da)

8.1.1.3 Ilaalinta iyo kobcinta waxsoo-saarka gudaha

Si loo dhiiri geliyo loona ilaaliyo wax soosaarka dalka, waxay siyaasada Miisaaniyadda 2023, dhiirigalinaysaa waxsoo-saarka gudaha, taas oo loo samayn doono Cashuur Dhaaf Alaabta Caydhiin ee ay u baahan yihiin Warshadaha Dalku (Raw Material) iyo Qalabka Kalluumaysiga iyo Beeraha. Isla markaana la dejiyay Siyaasado lagu ilaalinayo wax soosaarka gudaha sida:

- in la jideeyo Cashuur lagu ilaaliyo wax soo saarka gudaha oo lagu soo rogo Badeecooyinka la midka ah ee ka imanaya Dibeda
- in suuq dibedeed loo raadiyo wax soo saarka gudaha.
- In daraasad laga sameeyo xaaladda tartan dhaqaale ee wadamadda jaarka

8.1.1.4 Diyaarinta Aagga loogu talo galay Warshadaha (industrial Zone)

Si loo dhiiri galiyo Maalgashadayaasha, waxa loo baahan yahay Aag loogu talo galay Warshadaha isla markaana u fududaynaysa Maalgashadayaasha Gudaha iyo Dibed-ba inay helaan dhul ay maalgalin ku sameeyaan.

Si hadaba taasi u hirgasho, waxa siyaasada Miisaaniyadda 2023 ku jirta in Xukuumadu diyaariso Dhul loogu talo galay Warshadaha taas oo qayb ka mid ahna loogu daray Miisaaniyadda 2022



8.1.1.5 Sii wadida Mashruuca Shaqo Qaran

Sidaan wada ogsoon nahay, waxa xukuumadu hirgalisay afartii sano ee u dambeeyey Mashruuca Faa'iidada badan laga dheefay ee shaqo qaran, kaas oo shaqo Abuur u sameeyay in ka badan 3.400 oo Jaamiciiyiin Reer Somaliland ah. Kaas oo ay Dowladdu bilowday sanadkii 2019 ilaa hadana socda.

Sidaa awgeed, siyaasadda Miisaaniyadda 2023 waxa ka soo baxday in la sii wado Mashruuca shaqo qaran, kaas oo loo qoondeeyay in la qaato 500 qof Sannadka 2023 .

8.1.1.6 Kaydka ku -talo galka Dhacdooyinka lama filaanka (Contingency fund)

Si qaranku uga gaashaaman-karo intii awoodiisa ah arrimaha ay keenaan Masiibooyinka dabiiciga ah ee dunida ka dhacaya sida: Fatahaadaha, Duufaanaada, Abaaraha, Xanuunadda iyo wax kasta oo lama filaana, waxa miisaaniyadda 2023 la laban- laabay qoondadii loo qoondeeyay in lagula tacaalo arrimaha lama filaanka ah hadii ay dhacaan ilaahay inaguma keenee

8.1.1.7 Joojinta qaadista lacagaha aan sharciga ahayn (illegal fees)

Waxa jirta in Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Dowladda Dhexe qaar ka mid ahi qaadaan lacago aan sharci ahayn. Sidaa awgeed, waxaan dhamaan la mamnuucay in la qaado lacago /ujuurooyin aan sharciga Maaliyaddadu jideyn, kuwaas oo joojintooda xukuumaddu hore qoraalo uga soo saartay. Sidaa darted, Siyaasadda Miisaaniyadda 2023-ku, waxay mamnuucaysaa qaadista lacago/ujuurooyin aan shuruucda Maaliyaddu jideyn.

8.1.1.8 Fududeynta Nidaamka Cashuur bixinta.

Siyaasadda Miisaaniyadda 2023 waxay dhiirglinaysaa fududeynta nidaamka Cashuur bixinta, taasi oo qofka Cashuurta ku waajibtay si sahlan u bixin doono, isla markaana la sameeyay system Electronic ah oo la yidhaahdo E-Cash, kaas oo qofku ku bixin karo Cashuurta adeegyada electronic ah ee lagu dhex isticmaalo Tilifoonka sida Zaad-ka iyo E dahabka. Dhinaca kale, waxay siyaasadda Miisaaniyaddu sii xoojinaysaa sii wadidda nidaam Electronic ah oo u saamaxaya Cashuur bixiyuhu in uu isaga oo jooga goobtiisa ganacsi ku soo bixin karo Cashuurta (Taxpayers' on-line portal). Waxa kale oo siyaasaddu tilmaamaysaa yareynta wakhtiga iyo talaabooyinka lacag bixinta cashuuraha berriga iyo Kastamadda, fulinta ganaaxyadda iyo ciqaabaha kale ee xeerka dakhliga iyo Kastamaddu ku jideeyeen cashuur- diidka iyo cashuur la baxsigaba.

8.1.1.9 Hirgalinta dhamaan qaybahiisa kala duwan Nidaam Xisaabeeda iswada ee (SLFMIS)

Waxa qaabxisaabeedka dowladda lagu isticmaala nidaamka iswada ee (Somaliland Financial management Information System) ,sidaa awgeed waxa Miisaaniyadda 2023 qorshaysan in la dhaqan galiyo dhamaan qaybaha kale ee uu ka kooban yahay nidaamka SLFMIS isla markaana la gaadhsiiyo dhamaan Dawladaha hoose, Hay'adaha Madax abanaan, Mashaariicda Mucaawinooyinka ah iyo dhammaan goboladda iyo degmooyinka dalka, si loo gaadho yoolka dawladda ee isla xisaabtanka iyo daah-furnaanta Maamulka Maaliyadda..

8.1.1.10 Ka Qayb qaadashada Diyaarinta Miisaaniyadda ee Bulshada rayidka ah

Sida uu tilmaamayo nidaamka Maamulka Maaliyaddu, waxay siyaasadda Miisaaniyadda ee 2023 ay sii adkeynaysaa sii wadidda kulamadda wada tashi ee dadweynaha, ururadda aan dawliga ahayn iyo Wasaaradda Maaliyadda.



Kulamadaas oo looga dan leeyahay in dadweynuhu qeyb ka ahaadaan geedi soocdka diyaarinta Miisaaniyadda iyo in ay talo ku yeeshaan go'aaminta mudnaanaha Miisaaniyadda.

Kullamadan wada tashiga ee dadweyaha oo la bilaabay sanadkii 2020-ka, waxay soo jeediyaan talooyin muhiim ah oo ay ka mid ahaayeen sanadkan

- ❖ In la horumariyo oo kor loo qaado Dugsiyada Xirfadlayaasha Somaliland
- ❖ In mushahar kordhin loo sameeyo shaqaalaha dowlada maadaama sicir-barbar dhacay meceeshadiina kor u kacday
- ❖ In kharashkaadka hawl socodsiinta ee Wasaaraddaha la dhimo loona wareejiyo dhinaca horumarinta
- ❖ In jaamacadaha dalka dowladu u qorshayso qadar lacag ah oo ay ku sameeyaan cilmidhaadhisyo, maadaama jaamacaduhu yihiin kuwa ugu badan ee sameeya cilmibaadhisyo
- ❖ In mudnaanta la siiyo deegaanka si wax looga qabto Abaaraha inagu soo noqnoqda.
- ❖ In dowladu siyaasad cad ka yeelato sidii wax looga qaban lahaa xoola dhaqatada soo galaysa magaalooyinka si noloshii Miigu u sii jirto oo aan laga soo hayaamin
- ❖ Kor u qaadida cashuuraha si sharciga waafaqsan;
- ❖ in la xoojiyo maalgalinta warshadaha iyo wax-soosaarka;
- ❖ in laga hawl galo Dakhliyada kale ee maqan:
- ❖ Faahfaahinta saamiga dawlada faa'iido wadaaga Dekeda Berbera;
- ❖ Xoojinta adeega naafada;
- ❖ Dhiirgalinta shaqo abuurka danyarta;
- ❖ Isku dheeli tirka mashaariicda ee Deegaanadda iyo Gobolada
- ❖ Horumarinta kaluumaysiga;
- ❖ In miisaaniyada lagu saleeyo qorshaaha guud ee qaranka;

8.1.2 Siyaasadda lacageed (Monetary policy)

8.1.2.1 Sicir bararka

Siyaasadda Miisaaniyadda 2023 waxay xooga saaraysaa xakamaynta sicir-barbarka, iyadoo yoolka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda iyo Bangiga dhexe yahay in lagu hayo sicir barbarka 5%-6%, taasoo la dhaqan galiyay siyaasado loogu haynayo sicir bararka 5% ilaa 6%. Sida:

- in isticmaalka shilling ka Somaliland la xoojiyo isla markaana shay kasta oo Dowladdu iibsano lagu iibsado shilinka somaliland
- in lacagaha electoric ah ee lagu dhex isticmaalo mobile-da aan la iskugu diri Karin wax ka yar \$100

8.1.2.2 Isku bedelka Sarifka lacagaha

Siyaasada Miisaaniyadda ee 2023, waxay xooga saaraysaa siyaasada lacageed ee dhanka safirka lacagaha, taasi oo la doonayo in sarifka lagu hayo 8,000-8,500 slsh.



Sidoo kale, dawladda waxay joojisay daabacaadii lacagta 4tii sanno ee Xukuumadani xilka haysay, waxana ka go'an sii wadida siyaasadda lagu joojinayo daabacaadda lacagta, si dhaqaalaha iyo sarifkaba loogu sii hayo heerarka sare lagu tilmaamay.

8.1.3 Meelaha Mudnaanta la siiyey Miisaaniyadda 2023

Miisaaniyadda dawladda ee 2023, sida ku cad *Shaxda 10aad*, kharash-galka waxa loo leexiyey meelaha la is leeyahay waxayb door ka geysanyaan Horumarka iyo Baahiyaha Aasaasigaa ee Bulshada sida: Biyaha, Wax-soosaarka, Deegaanka, Waxbarashada (Technical Schools), Garsoorka, Caafimaadka, Doorashooyinka, Ammaanka iyo kaydka Qaranka

SHAXDA 11: Meelaha Mudnaanta la siiyay Miisaaniyadda 2023

| | | |
|---|--|--|
| 1 | Biyaha | Miisaaniyadda 2023 waxay xoogga saaraysaa kor u qaadida baahiyaha biyaha waxaana la qorsheeyey Ceelal, baliyo iyo Dhaamam, si loo yareeyo baahida biyo-yaraanta. |
| 2 | Waxbarashada | Miisaaniyadda sanadka 2023 waxay xooga saaraysaa kor u qaadida waxbarashada gaar ahaan iskuullada farsamada gacanta (Vocational Schools). |
| 3 | Wax soosaarka | Miisaaniyadda sanadka 2023 waxay muhimad siineysaa wax-soosaarka dalka gaar ahaan Beeraha & Kalluumeysiga. |
| 4 | Deegaanka | Miisaaniyada sanadka 2023 waxay mudnaanta siinaysaa daryeelka Deegaanka gaar ahaan, Seero xiliyeed-yada, si loo yareeyo saameynta abaaraha ee daaqa xoolaha. |
| 5 | Kharashka lama filaankaah (contingency fund) | Siyaasada Miisaaniyadda sanadka 2023-ka waxay kor u qaadeysaa kharashka loogu talo galagalay Arimaha lama filaanka ee masiibooyinka dabiiciga ah sida: abaaraha iyo Xanuunada degdeg ah. |
| 6 | Doorashooyinka | Si loo sii wado hirgalinta geeddi-socodka dumuqraadiyada, waxa la qorsheeyey qoondo lacag ah oo lagu qabto, wixii doorasho ah ee soo wajahan, taas oo dowladu dhankeeda u diyaarisay qadar lacag ah oo dhan \$15 million |
| 7 | Caafimaadka | Waxa mudnaanta la siiyay in kor loo qaado Guud ahaan Adeegga Caafimaadka, si loo yareeyo baahiyaha bulshada ee adeegga caafimaadka. |
| 8 | Garsoorka | Waxa Miisaaniyadda 2023 ay xooga saari doontaa kor u qaadidda adeega garsoorka, isla markaana laga caawin doonaa bahda garsoorka qalabeynta Xafiisyada iyo dacaytirka xafiisyada. |
| 9 | Amaanka | Waxa Mudnaanta lasiin doonaa Qaramaynta iyo Tayeynta Ciidamadda |



9 Guud Marka Guud ee Odoraska Dakhliga 2023

Wasaradda Horumarinta Maaliyaddu yoolka la hiigsanayo sanadka 2023 waxa lagu saleeyay dakhliga dhabta ee soo xarooday mudada sagaalka bilood ee sanadka 2022 . Odoroska dakhliga ee sanadka 2023-ka waxa uu noqon doonaa **2.5 Trillion**, (laba tiriliyan iyo shan boqol oo milyan SLSH), dakhligaas oo ka badan odoroskii sanadka 2022-ka 5% . Korodh iyo hoos- u dhac waa ka suurto gal xaaladda Somaliland haatan ka jira .Hakad ku yimi isku socodka ganacsiga caalamiga ah iyo saamaynta masiibadii dabka ee suuqa waaheen ayaa la filayaa in saamayn taban ku yeeshaan odoroska dakhliga ee sanadka 2023- ka.

Odoroska dakhliga ee sanadka 2023-ka ayaa lagu saleeyay siyaasada hanaanka Cashuuraha, wax-soosaarka dhaqaalaha guud ee dalka, Heerka sicir bararka iyo sarifka lacagaha qalaad, dhoofka xoolaha nool iyo dhaqdhaqaaqa ganacsiga caalamiga ah..

Wasaradda horumarinta Maaliyaddu waxay is bedel ku samaysay hanaanka iyo siyaasadda cashuuraha, taasoo kor u qaadi doonta qoondada dakhliga guud ka yahay wax-soosaarka dhaqaalaha guud ee dalka (Revenue GDP ratio), isla markaana hiigsiga Wasaradda Maaliyaddu yahay in la gaadhsiiyo 15% mustaqbalka dhaw. sidoo kale kor u qaadida saamiga cashuuraha beriga ayaa ah mudnaanta kowaad, si loo yareeyo ku tiirsanaanta Cashuuraha Kastamada oo hada ah 76% dakhliga guud ee dalka .

Koboca dakhliga mudadii sedexdii sanadood ee u dambeeyay ayaa muujinaysa koboc dakhli 10% taasoo ku timi dedaalka iyo dib u habaynta lagu sameeyay hanaanka dakhli ururinta dalka. sidoo kale Wasaaradda Maaliyaddu waxay awood saartay hanaanka cashuur-bixinta, wacyigelinta iyo diwaangelinta cashuur bixiyaha. Odoroska Dakhliga ee sanadka 2023-ka oo ku salaysan aragtiyo taxader leh iyo kuwo rajo leh (togan) islamarkana u muuqda mid ka turjumaya xaaladaha dhaqaale ee dalka, hadaba odoroska Dakhliga ee sanadka 2023-ka meelaha ugu muhiimsan ee uu ka iman doona waxa ka mid qaybahan soo socda.

Cashuuraha Macaashal Macaashka iyo Faaiidada

Cashuuraha Alaabta iyo Adeega

Cashuurta Macaash-macaashka Shaqaalaha Dowladda iyo kuwa rayidka ah

Cashuurta Ganacsiga Caalamiga ah

Deeqaha dawladdaha iyo hayadaha Caalamiga

Dakhliga libka iyo Adeega Dawladda

Dakhliga hantida sida kirooyinka hantida Dawladda

Guud-marka Guud ee Odoroska Dakhliga 2022



SHAXDA 12: Isbarbardhiga Soo Koobida Qeybaha Waaweyn ee Dakhliga 2022-2023

| Faahfaahinta | Odooroska 2023 | Odooroska 2022 | faraq |
|--|--------------------------|--------------------------|-----------------------|
| Macaashal Macaashka Ganacsiga iyo Faa'idada | 55,934,856,085 | 52,874,027,856 | 3,060,828,229 |
| Cashuuraha Shaqalaha Dawladda iyo kuwa Rayidka | 141,473,936,961 | 122,276,223,424 | 19,197,713,537 |
| Cashuuraha Badeecadaha & Adeega | 860,693,920,407 | 804,664,152,211 | 56,029,768,196 |
| Ganacsiga Caalamiga ah | 1,198,800,112,172 | 1,185,087,774,357 | 13,712,337,815 |
| Cashuuraha Kale | 105,997,618,540 | 104,425,929,707 | 1,571,688,833 |
| Dakhliga kale | 167,436,027,697 | 141,124,786,780 | 26,311,240,917 |
| Hadhaga qasnada | | 87,159,700,885 | -87,159,700,885 |
| Wadarta Dakhliga Guud | 2,530,336,471,862 | 2,497,612,595,220 | 32,723,876,642 |

9.1 Meelaha la filayo in uu ka yimaado korodhka Dakhliga 2023

Waxa la filaya Sannadka 2023 in dakhligu kordho 5%, iyadoo ay sabab u tahay qodobadan soo socda;

- Sal-balaadhinta Cashuuraha saran Badeecadaha iyo Adeega (GST): taasoo lagu guulaystay sanadadii u dambeeyay Hirgelinta mishiinadda adeega iyo alaabta GST-ga, Qorshaha siyaasada cashuuraha ayaa ah in adeega GST-ga laga hirgaliyo dhamaan goobaha ganacsiga ee dalka.
- Dardar galinta Cashuuraha Macaashka iyo faa'iidada, wasaradda Maaliyaddu waxay awooda saari doonta cashuuraha tooska ah sida cashuuraha macashal macaashka shaqalaha rayidka, macaashal macaashka ganacsiga iyo kirada guryaha oo tiro koob sagan la sameeyay sanadadii u dambeeyay.
- Cashuuraha soo dajinta iyo dhoofka oo la filayo in ay kor u kacaan sanadka 2023-ka, iyadoo hakad ku yimi sanadka 2022-ka duruufo badan oo jira awgeed. Sidoo kale , wasaraddu Maaliyaddu waxay xoojin doonta cashuuraha xakamaynta baddeecadaha si loo dhiiri galiyo ganacsi dalka .
- Hirgelinta goobo kastam oo cusub oo laga hirgeliyo gobolada bariga Somiland iyo ka hortaga koontarabaanka ee gobolada bariga somaliland .
- Kor u qaadida qadarka tacriida baddeecadaha aan daruuriga ahayn sida qaadka, sigaarka, tubaakada iyo kordhinta qoondada taakulaynta xarumaha dhimirka.
- Dakhliyada ka imanaya Wasaradaha iyo hayadaha Dawladda 2023: wasaaradaha iyo hayadaha bixiya ruqsadaha ayaa la filayaa in lagula xisaabto adeega ama ruqsadaha ay bixiyaan..

9.2 Faah-faahinta Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2023

Sida ka muuqata jaantuska 20aad, 98% Dakhliga guud ee dawladda waxa uu ka iman doona Kastamada iyo Cashuuraha Beriga halka 2% uu ka iman doono Wasaradaha iyo Hayadaha kale ee dawladda. Saamiga ugu badan waxa uu ka iman doona Kastamada 76% halka cashuuraha Beriga ay noqon doonan 22% ,Geesta kale Saamiga Cashuuraha beriga ayaa sameeyay kor u kac 2% marka la barbar dhiga saamigii 2022 oo ah 20%, dhanka kale saamiga kastamada ayaa wali ah




kan ugu badan Dakhliga Dawladda tan iyo intii Somaliland jirtay , Sobabtoo ah Dakhliga ugu badan ee Dawladda oo kasoo xarooda Kastamada.

SHAXDA 13: Faah-Faahinta Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2023

| C/Bariga | C/Beriga | 561,491,402,474 |
|---|---|--------------------------|
| Kastamka | Kastamka | 1,907,712,333,179 |
| 1140806 Daakhliga Faafinta & lidhehda | Wasaarada Warfaafinta iyo Dhaqangelinta | 920,417,438 |
| 1140807 Dakhliga kale ee Boosaha & Isgaadhsiinta | Wasarada Isgaadhsiinta iyo Tiknolojiyada | 7,927,057,906 |
| 1140808 Dakhliga Liisamada Ganac/& Ruqsooyinka | Wasaarada Ganacsiga, Warshadaha iyo dalkiiska | 19,024,420,667 |
| 1140813 Dakhliga Ruqsadaha Beeraha | Wasaradda Beeraha | 291,949,111 |
| 1140814 Dakh/Feega Kaluumaysiga Bada | Wasaradda Xanaanada Xoolaha iyo Kaluumaysiga | 1,261,878,705 |
| 1140815 Dakh/Liisamada/Ruqsooyinka Macdanta | Wasaradda Macdanta iyo Tamarta | 1,214,037,070 |
| 1140809 Khidmada warqada ogolaanshaha shaqada | Wasarada Shaqada iyo Arimaha Bulshada | 5,471,692,282 |
| 1415002 Dakhliga Kirada Guryaha & Bakhaarada | Wasaarada H/Guud | 549,898,760 |
| 1420104 Income from sales of national resources | Ministry of Environment and Livelihoods | 237,998,286 |
| 1420105 Dakhliga libka Khayraadka Dalka | Wasarada Deegaanka iyo H.Reer miyiga | 5,232,701 |
| 1420202 Dakh/Nootaayoyinka | Wasarada Cadalada iyo garsoorka | 472,760,438 |
| 1420203 Ruqsadda Ogolaanshaha Mihnadleyaasha Caafimaadka | Komishanka mihnadlyasha caafimadka | 742,034,019 |
| 1420204 Dakhliga Baadhista Cuntada & Daawada | Hay'adda dhawrista tayada | 235,409,700 |
| 1420205 Dakhliga Ruqsadda Shirkadaha Dhismayaasha | | 862,149,825 |
| 1440101 Saamiga Kabka Dawladaha Hoose | Wareejimaha kabka Dowladdaha Hoose | 21,000,000,000 |
| 1420212 Dakhliga Ogolaanshaha Hay'addaha Caalamiga ah iyo kuwa gudaha | Wasaradda qorshaynta qaranka | 915,799,300 |
| TOTAL | | 2,530,336,471,861 |

Jaantuus 20: Soo Koobida Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2023





9.3 Odoros Dakhliga Kastamada oo Deegamaysan 2023


Sida ka muuqata shaxda 14aad iyo jaantuska 23aad ee Saamiga Kastamada gobalada dalka, kastamka Berbera ayaa ah kan ugu dakhli badan kana soo xaroon doono 67.4% marka la barbardhigo kastamade kale ee dalka, Kastamka Kalabaydh oo ah kastamka labaad ee ugu dakhliga badan ayaa laga filayaa 16.5% inuu soo saaro, halka kastamada Saylac iyo Madaarka Hargeisa ay saamiga guud ee dakhliga Kastamada ka noqon doonan 6.1 % iyo 3.5 % say isugu xigaan. Saamiga kastamka Baligubadle ayaa ah 2% isla markaana ah kastamka shanaad ee ugu dakhli badan kastamada. Dhanka kanka kale kastamada kale ayaa noqon doona 4.5%.kastmada Ina-guuxaa iyo daba-goryaale (Oodwayne),Gambadha iyo kantaroolka Barriga Ceerigaabo ayay si rasmi ah wasaraddu uga dhigtay Goobo kastam.

SHAXDA 14: Odoraska Dakhliga Kastamada ee Miisaaniyadda 2023 oo Deegaamaysan

| Goobaha | Oodoroska 2023 | Oodoroska 2022 | Faraqa | % Isbedelka | % Saamiga Guud |
|------------------|--------------------------|--------------------------|------------------------|-------------|----------------|
| Allaybaday | 2,635,643,202 | 4,020,260,457 | (1,384,617,255) | -34% | 0.14% |
| Abaarso | 511,743,179 | 288,838,096 | 222,905,083 | 77% | 0.03% |
| Bali-gubadle | 34,386,096,950 | 7,258,367,229 | 27,127,729,721 | 374% | 1.80% |
| Beer | 294,452,842 | 171,769,778 | 122,683,064 | 71% | 0.02% |
| Berbera | 1,285,862,332,061 | 1,217,249,294,283 | 68,613,037,778 | 6% | 67.40% |
| Borama | 29,317,976,636 | 22,678,450,987 | 6,639,525,649 | 29% | 1.54% |
| Buroa | 3,212,815,161 | 5,132,035,283 | (1,919,220,122) | -37% | 0.17% |
| Caasha-cado | 4,476,492,978 | 3,206,431,092 | 1,270,061,886 | 40% | 0.23% |
| Caynabo | 2,444,914,321 | 1,736,929,430 | 707,984,891 | 41% | 0.13% |
| Dilla | 74,144,498 | 30,048,325 | 44,096,173 | 147% | 0.00% |
| Farawayne | 3,464,979,684 | 6,540,971,786 | (3,075,992,102) | -47% | 0.18% |
| Hargeisa | 1,597,108,492 | 940,284,070 | 656,824,422 | 70% | 0.08% |
| Kalabaydh | 313,832,983,780 | 398,094,827,128 | (84,261,843,348) | -21% | 16.45% |
| Laascaanood | 9,204,617,068 | 8,390,023,387 | 814,593,681 | 10% | 0.48% |
| Lug-haya | 27,427,631 | 443,633,164 | (416,205,533) | -94% | 0.00% |
| Hargeisa Airport | 67,529,013,228 | 41,198,151,326 | 26,330,861,902 | 64% | 3.54% |
| Ceerigaabo | 2,082,726,379 | 2,815,874,680 | (733,148,301) | -26% | 0.11% |
| Wajaale | 26,379,815,888 | 24,027,893,447 | 2,351,922,441 | 10% | 1.38% |
| Xariirad | 3,801,988,679 | 999,931,544 | 2,802,057,135 | 280% | 0.20% |
| Zaylac | 116,575,060,522 | 111,525,044,485 | 5,050,016,037 | 5% | 6.11% |
| TOTAL | 1,907,712,333,179 | 1,856,749,059,977 | 189,254,488,172 | 10% | 100.00% |



Jaantuus 21: Saamiga Goob waliba ka tahay Wadarta Guud ee Kastamada Miisaaniyadda 2023




9.4 Odoros-ka Dakhliga Cashuuraha Berriga 2023 oo Deegamaysan

Sida ka muuqata jaantuska 22^{aad} iyo shaxda 15^{aad} ee hoose, Odoroska dakhiga Cashuuraha Berriga ee Miisaaniyadda 2023 waa (560 Billion SLSH), waxaanu ka badan yahay **13%** ku talo galkii sanadkii 2022. Marka la eego dhanka Saamiga ay Goob waliba ka tahay Dakhliga guud ee Cashuuraha Berriga, Hargaysa ayaa ah tan ugu badan isla markaana laga filayaa inay soo saarto kala badh in ka badan **72%** Wadarta Guud ee Dakhliga Cashuuraha Berriga, halka ay ku soo xigto Berbera oo noqonaysa **15.60%**, Boorama **3.96%**, Burco **3.77%** iyo Gabiley **2.24%**, Halka wadarta goobaha kale ee Cashuuraha Berrigu noqon doonan **2.43%**.

SHAXDA 15: Odoraska Dakhliga Cashuuraha Berriga ee Miisaaniyadda 2023 oo Deegaamaysan

| Goobaha | Odoroska 2023 | Odoroska 2022 | Faraqa | % Isbedelka | % Saamiga Guud |
|--------------|------------------------|------------------------|-----------------------|-------------|----------------|
| Berbera | 87,591,967,354 | 80,026,868,937 | 7,565,098,417 | 9% | 15.60% |
| Borama | 22,244,542,620 | 20,282,251,525 | 1,962,291,095 | 10% | 3.96% |
| Buroa | 21,177,562,830 | 19,425,119,208 | 1,752,443,622 | 9% | 3.77% |
| Caynabo | 1,262,171,506 | 1,163,607,910 | 98,563,596 | 8% | 0.22% |
| Ceerigaabo | 5,783,609,876 | 5,355,886,787 | 427,723,089 | 8% | 1.03% |
| Gebilay | 12,588,243,005 | 11,540,265,887 | 1,047,977,118 | 9% | 2.24% |
| Hargeisa | 404,172,338,552 | 369,505,863,396 | 25,666,475,156 | 7% | 71.98% |
| Laascaanood | 4,633,754,716 | 4,264,909,878 | 368,844,838 | 9% | 0.83% |
| Zaylac | 1,383,907,261 | 1,276,199,236 | 107,708,025 | 8% | 0.25% |
| Oodwayne | 653,304,754 | 615,081,469 | 38,223,285 | 6% | 0.12% |
| Total | 561,491,402,474 | 512,840,972,763 | 39,650,429,711 | 8% | 100.00% |

Jaantuus 22: Saamiga Goob waliba ka tahay Wadarta Guud ee Odoroska Miisaaniyadda 2023 ee Cashuuraha Berriga




9.5 Isbarbardhiga Dakhliga dhabta ah ee Cashuuraha Beriga 2018-2022

